
BAABUSALAAM

# AF-SOOMAALI

## Jawaabo & Su'aalo

Ardayda Dugsiga Hoose/Dhexe



2019
Second Edition

Scanned by TapScanner

Jamhuuriyadda Somaliland
Guddida Imtixaanka Qaranka

Imtixaanka Shahaadiga ah ee Fasalka 8aad
Maadadda Af Soomaaliga

Republic of Somaliland

# AF-SOOMAALI

**Buugga Imtixaannada Iyo Jawaababahooda Ee Maadadda Af-Soomaaliga Dugsiyada H/Dhexe**

Daabacaadii labaad 2019

All rights reserved. No part of this book can be reproduced, stored, recorded or transformed in any means, electronic, photocopying or otherwise without permission of the Somaliland National Examination and Certification Board.

First edition compiled by: **Mustafe Maxamed Cabdi (Baxnaan)**

Second edition compiled by: **Cabdirisaaq Maxamed Cabdillaahi Guuleed**

*Scanned by TapScanner*

Jamhuuriyadda Somaliland
Guddida Imtixaanka Qaranka

Imtixaanka Shahaadiga ah ee Fasalka 8aad
Maadadda Af Soomaaliga

# REPUPLIC OF SOMALILAND

## Preface

Administration of Somaliland national examination and certification board (SLNECB) authorized the compilation, production and publication of Somaliland national grade eight Somali examination books with simplified answers and solutions for Somaliland upper primary students. The contents of this book are based on the past national Somali examinations that are arranged in chapters. The production of this book came after a success through great and selfless effort, made by SLNECB and the teacher who compiled it.

This was necessitated by the tremendous needs of the whole Somaliland upper primary students in order that they get equal rights and experience in performing Somaliland national examinations in particular and the international exanimations in general. This is a comprehensive and up-to-date revision intended for grade eight students to practice and achieve its objectives as revision guide.

SLNECB, headed by Daud Ahmed Farah is extremely hopeful that all Somaliland students and teachers will enjoy using and utilizing these valuable books.

Daud Ahmed Farah

Chairman of Somaliland national examination and certification board

Scanned by TapScanner

# Acknowledgement

Somaliland National Examination and Certification Board (SLNECB) is very grateful to the first edition compiler **Mustafe Maxamed Cabdi (Baxnaan)** and the second edition compiler **Cabdirisaaq Maxamed Cabdillaahi Guuleed** for their selfless effort in the compilation of Somaliland national grade eight Somali examinations and for answering all national Somali examination questions in a clear and understandable manner. SLNECB would like to thank **Muktar Awmuse Hassan (Cawil)** for his crucial role in organizing and improving this book. SLNECB would also like to thank **Mohamoud Abdullahi Khalif** for his overall designing and contribution to this book. In general, SLNECB would also like to appreciate any person who provided direct or indirect contribution and effort of typing, suggestions, encouragement and improvement of this book.



Scanned by TapScanner

# TUSMADA BUUGGA

Cutubka 1 aad: Caddaalada Illaahay 2006 .......... 6
1.1. Goobo geli jawaabta saxda adoo adeegsanaya sheekada kor ku xusan .......... 7
Cutubka 2 aad: Baaraandeg 2007 .......... 8
2.1. Goobo geli jawaabta saxda adoo adeegsanay sheekada kor ku xusan .......... 9
2.2. Buuxi meelaha bannaan. .......... 11
Cutubka 3 aad: Sigaarka 2008 .......... 12
3.1 . Goobo geli jawaabta saxda ah adoo adeegsanaya sheekada sare .......... 13
3.2. Ka jawaab su'aalahan kooban .......... 15
3.3. Ka jawaab su'aalahan fidsan .......... 16
Cutubka 4aad: Socdaalkii Xasan-yare 2009 .......... 17
4.1. Gali goobo jawaabta saxda ah adoo adeegsanaya sheekada kor ku xusan .......... 18
4.2. Su'aalo kooban iyo su'aalo fidsan .......... 20
5. Goobo gali aan curis lahayn .......... 22
5.1. Goobo geli jawaabta ugu saxsan .......... 22
Cutubka 6 aad: Dalxiis 2011 .......... 25
6.1. Goobaab jawaabta ugu saxsan adoo adeegsanaya sheekada kor ku xusan .......... 26
6.2. Ku buuxi meelaha banaan ereyada ku jira sanduuqa. .......... 29
6.3. Su'aalo kooban iyo su'aalo fidsan .......... 29
Cutubka 7aad: Geel-badane lagu sheeg 2102 .......... 30
7.1. Goobaab jawaabta saxda adoo adeegsanaya sheekada kor ku xusan .......... 32
Cutubka 8 aad: Xeerkii Maganta Soomaalida 2013 .......... 35
8.1. Goobaab jawaabta saxda ah adoo adeegsanaya sheekada kor ku xusan .......... 36
8.2. weydiimo .......... 41
Cutubka 9 aad: Fardaha Soomaalida 2013 .......... 42
9.1.Goobaab jawaabta saxda ah adoo adeegsanaya sheekada kor ku xusan .......... 43
Cutubka 10 aad: Geela 2016 .......... 47
10.1: Goobaab jawaabta saxda ah adiga oo adeegsanaya sheekada kor ku xusan: .......... 49
Goobo gali aan curis lahayn 2017 .......... 52
12. Tahriibkii Hanad 2018 .......... 56
Cutubka 13 aad: Maansooyin .......... 59



©SLNECB

Scanned by TapScanner

Cutubka 14 aad: Maahmaahyo .......... 71
Cutubka15 aad: Macnaha ereyada iyo lidkooda .......... 78
Qaybta 1aad .......... 78
Qaybta 2aad .......... 78
Qabta 3aad .......... 79
Qaybta 4aad .......... 79
Qaybta 5aad .......... 80
Qaybta 6aad .......... 80
Qaybta 7aad .......... 81
Qaybta 8aad .......... 82
Qaybta 9aad .......... 83
Cutubka 16 aad: Naxwaha: Dhisme-Afeedka .......... 85
Qaybta 1aad (2005) .......... 85
Qaybta 2aad .......... 85
Qaybta 3aad .......... 86
Qaybta 4aad .......... 86
Qaybta 5aad .......... 87
Qaybta 6aad .......... 87
Qaybta 7aad .......... 88
Cutubka 17 aad: Hees hawleedyo .......... 92
Cutubka 18 aad: Curisyo .......... 95
Cutubka 19: Jawaabaha imtixaanada .......... 98
Cutubka 20 aad: Habka Loo Qoro Curiska .......... 123
Dhammaad .......... 126

Scanned by TapScanner

## Cutubka 1 aad: Caddaalada Illaahay 2006

Laba haween ah oo kala da'weyn ayaa habeen wada fool qaaday. Mid ka mid ah ayaa waxay dhashay wiil bakhti ah, middii kalena waxay dhashay wiil fayow; midna cid kale lama joogin.Tii da'deedu weynayd ee ilmaha bakhtiga ah dhashay waxay si degdeg ah u xabaashay wiilkeedii bakhtiga ahaa; ka dibna waxay ku qabsatay tii wiilka fayow dhashay.

Murankoodii ayaa qoysaskii ku dhowaa maqleen. Intii ay labadoodiiba iyo wiilkii yaraa isku kaxeeyeen bay geeyeen meel nin gar yaqaanimo lagu tuhunsanaa joogay. Garsoorihii waxa uu yidhi, "Bal hadla aan idin maqlee". Labada dumar ahi way kala aftahansanaayeen; waxaana loo xukumay tii aan dhalin.Tii laga xukumay waxaa ay qaadan wayday wiilkeedii ay dhibka, walaaca iyo xanuunka foosha la soo martay oo naag kale sidato, lagana siiyey.

Waa ay samri wayday, gunuus, oohin iyo cabasho ay meel walba la tagtay ayaana ay joojin wayday. Waxaana ku dhacday hurdo la'aan.Marka hiqdeedii iyo hammigeedii laga yaabay ayaa dadkii deriska ahaa isla garteen in cid kale oo gartii dib u eegta loo geeyo. Waxaana loo geeyey nin waayo aragnimo, aqoon iyo xaqsoor lagu yaqiin. Garsoorihii markii uu hadalkii dhegeystey markhaatina waayey ayuu yidhi, "Mindi ii keena! Wiilkana midba dhinac ha qabsato, waan idiin kala goynayaaye".

Tii aan dhalin ee ku murmaysey ayaa dhinaceedii si degdeg ah ula booday iyada oo aan dareenkeedii waxba iska bedelin. Garsoorihii oo mindidii afka badnayd dul haya ayaa illayn beer waa belo'e tii dhashay iyada oo ilmo ka da'ayso kor u qaylisay oo tidhi, "Alla! iyada ha la siiyo intii la kala jari lahaa". Markaas ayey garsoorihii u caddaatay in tan ka naxday dhashay, waxaana uu siiyey wiilkeedii lagu haystey. Farxad iyo naxdin baa mar ku wada kulmay, waxayna dib ugu guulaysatay wiilkeedii muranka ku jirey ee xaqdarrada hore loogaga qaatay.Halkaas ayay tii kalena ceeb iyo gacmo madhan kala hadaaftey.

©SLNECB



Scanned by TapScanner

**1.1. Goobo geli jawaabta saxda adoo adeegsanaya sheekada kor ku xusan**

**1. Garsoorihii hore waxa uu wiilka siiyey:**

B. Tii aan dhalin
T. Tii dhashay
J. Waa uu kala jeexay
X. Midna ma siin.

**2. Labada haween ahi waa ay:**

B. Kala da' waynaayeen
T. Isleekaayeen
J. Markhaatibaa kala furay
X. Labadooduba wiilka way wada dhaleen.

**3. Waxa garta labaad loo baahday:**

B. Markii tii wiilka dhashay samirtay
T. Markii tii wiilka dhashay samri wayday
J. Markii uu wiilka caatoobay uu aamusi waayay
X. Markii ay tii aan dhalin iska nacday.

**4. Waxa ilmaha dhashay**

B. Tii markii hore la siiyay
T. Ta ka naxday ee markii dambe la siiyay
J. Hooyo kale oo intii aanu dhalan dhimatay
X. Wax aan jirin bay ku doodeen.

**5. "Beerow ba'" waxa loo ga jeedaa:**

B.Beer baa baaba'ay
T. Naxariis darro
J. Waalidku ilmihiisa waa u naxariis badan yahay
X. Beer baryaya oo qaboobay.



©SLNECB

Scanned by TapScanner

... waa Cigaal oo ina Shiidaad ahaa, nin kastaaba ha iska hadlee xikmaawi fiiro dheer ayaa uu ahaa. Waxa lagu xaman jiray fuleynimo. Laakiin waayadii dambe waa lagu xariiray. Inkasta oo uu sababo badan isku difaacay, haddana waa ay ka socon weyday.

Arrimo badan oo ay ka mid ahaayeen baraarkii uu la diday , ridii garo ee"Garo way na garanaysaa oo way na gaadaysaa" uu yidhi iyo sheekadan Damal ayaa ku caddeeyey ceebta fuleynimo. Waxa uu dedaalaba, degta ayaa uu u ritay fuleynimadii markii laga dayn waayey. Waxa keli ah oo u bannaan in uu xeelado iyo sababo raaciyo si uu u asturo ceebta if baxday.

Waxa uu dhuumaalaystaba, maalin ayaa uu geel la raacay wiil yar. Dhul hawd dam ah ayaa uu geelu daaqayey. Hore ayaa loo yidhi, "Xaska gaadahaa ugu jira iyo aar xabeebsamaye".Haddii cadceeddu gadiidka duhurnimo ka galgalatay asayna gaadhin casar ayaa aar yabladay hashii Damal dhalada uga baxay. Qaylada ayaa la isla oogsaday. Cigaal markuu milicsaday aarka shaashka leh iyo Damal oo isa saaran ayuu geed fooda geliyey. "Waar bahalku weynaa, weger Allow ila baxso, Damaleey waa inoo aakhiro, waa addii geel lagu maalo, haddii kale iska dhimo, dadka uun baan wax la abiye!" Galabtii ayuu geela ku soo carraabiyey baroortii Damal.

**xii Damal dilay**
**dameer le'eg**
**ka daba weyn**
**ma daayow**
**u soo dayn**
**Damal dilay**
**arkaayo**
**giiraa !**

oo ayro moholiya ahayd ayaa laga samri waayey. Aarkii oo la soo aa Cigaal qoortii lugaha loogu xidhay, xaar inta uu isku sii daayey yidhi, "Daruur qudhuntay baa igu da'day"

Scanned by TapScanner

**2.1. Goobo geli jawaabta saxda adoo adeegsanay sheekada kor ku xusan**

**1. Cigaal waxaa lagu xaman jirey ..............................**

B. Nin xigmadeed
T. Nin faan badan
J. Nin fuleynimo badan
X. Nin fiiro badan

**2. Wallee nin kastaaba ha iska hadlee Cigaal ..............................**

B. Faan u daa
T. Foolxumo u daa
J. Xigmad iyo xiniin u daa
X. Xigmad u daa

**3. Waxa Cigaal loogu xariiray fuleynimada ..............................**

B. Ridii garo iyo geesley kale
J. Baraarkii gordanaa, garo iyo Damal
J. Geesley garbisay iyo ido gordanaa
X. Gebi uu xoor kala dhacay iyo geedo qudhmay

**4. Dhaaxuu difaacay fuleynimada ee waa ..............................**

B. Laga deyn waayey
T. Laga dafiray
J. Loo dayn waayey
X. Laga deedifeeyey

**5. Damal waxaa uu aarku dilay xilli ..............................**

B. Ay gadiidkii duhur ahayd
T. Ay galab ahayd
J. Ay gadiidkii ka janjeedhsatay qorraxdu
X. Ay ahayd casar liiqa cadceeddu dhigtay

**6. Waxa uu degta u ritay:**

B. Ceebtii sokeeye
T. Fuleynimo saarnayd
J. Fagaare ka
X. Foolxumo

Scanned by TapScanner

**7. In badan ayuu ka warwareegayey xil ceebi ka raacdo'e:**

B. Waxa uu madaxa saaray maalintii Damal
T. Waxa uu madaxa sudhay maalintii uu is duuduubay
J. Waxa uu madaxa sudhay maalintii Siraw
X. Waxa uu madaxa saaray maalintuu dhuuntay

**8. "Xaska gaadahaa ugu jira iyo aar xabeebsamaye":**

B. Waa lo'da
T. Waa geela
J. Waa adhiga
X. Waa fardaha

**9. Geelu maalintaa waxa uu daaqayey:**

B. Hawd durdur ah
T. Dhul hodan ah oo buuraley ah
J. Bannaan lagu hoobtay
X. Hayjad cidla' ah

**10. Aarka dilay Damal waa uu:**

B. Gaajaysnaa
T. Dheregsanaa
J. Dhabadhabaysnaa
X. Dheelalowsnaa

**11. Kaymaha jiqda ah iyo meelaha madow:**

B. Carruurtu waa ay ku faraxdaa
T. Carruurtu waa ay ku foognaataa
J. Carruurtu waa ay ka baqataa
X. Carruurtu waa ay ka bogataa

**12. Cigaal libaaxa hasha fuushan:**

B. Si fiican ayaa uu isha uga buuxsaday
T. Si fiigo leh ah ayaa uu uga jeedsaday
J. Si fiiro leh ayaa uu u daawaday
X. Si feejigo ah ayaa uu u milicsaday

Scanned by TapScanner

**13. Cigaal waxa uu u ku cataabay:**

B. Weger waar bahalku waynaa

T. Weger waar bahalku xoog weynaa

J. Weger waar bahalku xoor weynaa

X. Weger waar ma dameer baa

**14. Damaleey waa inoo aakhiro haddii:**

B. Geel lagu maalo

T. Lo' lagu maalo

J. Ido lagu maalo

X. Riyo lagu maalo

**15. Haddii kale iska dhimo dadka:**

B. Uun baan wax ka qadin doonaaye

T. Uun baan wax la qabiye

J. Uun baan wax la cabayn doonaaye

X. Uun baan wax ka ceshan doonaaye

## 2.2. Buuxi meelaha bannaan.

1. Wixii Damal ....dilay....................................
2. Oo ka ....dabi weyn....................................
3. Soo ma ....alanyow....................................
4. Waan ....ar kanyo....................................
5. Waa il....guura....................................

Scanned by TapScanner

# Cutubka 3 aad: Sigaarka

Dakhaatiirtu waxay had iyo jeer dadka sigaarka cabba kula taliyaan in ay iska joojiyaan cabbida sigaarka, laakiin aad bay ugu adag tahay in ay ka go'aan cabbida sigaarka .

Sababta ay dhakhaatiirtu dadka ugu diidayaan inay sigaarka cabbaan waxa ay tahay sigaarka waxa ku jira waxyaabo faro badan oo dadka caafimaadkooda halis ku ah. Waxaa ka mid ah waxyaabaha sigaarka ku jira maaddo madow oo loo yaqaan Daamur (Tar) oo marka qofku nuugo ku dhacda sambabbada, taas oo waxyeello u leh neefsashada, cunaha iyo qofkuna halis u yahay cudurka kansarka. Neefta loo yaqaano Kaarboon Monoksaydh waxa ay hoos u dhigtaa xawaaraha Ogsajiinta ee la falgala hab dhiska wareegga dhiigga. Sidaa awgeed, waxa la yaab leh dadku waxa uu u cabbo suntan ee ay naftooda halis u galinayaan.

Qaar ka mid ah dadka sigaarka cabbaa waxa ay jecel yihiin in dadka oo dhammi sigaarka wada iibiyaan, oo waxa ay dadka ku qanciyaan in uu sigaarku wanaagsan yahay oo uu qabow yahay, dadka aan cabbinna aanay ilbaxnimo lahayn . Sidaas darteed bay dhallinyaro fara badani raacday oo ay dhibaato u horseedday. Soomaalidu waxa ay ku maahmaahdaa, "Dhabbada yari dhabbada weyn bay kugu riddaa" taasi oo loola jeedo haddii qofku bilaabo caadooyin xun-xun in uu ku sii talax tegi doono.

Sigaarku dalkeenna si xad dhaaf ah ayaa uu uga buuxaa, oo dukaan walba waa lagu iibiyaa, aad baanu raqiis u yahay. Dawlado badan oo dunida ka mid ah ayaa cashuur xad dhaaf ah sigaarka dusha ka saara, cadaadis weyna saaray sidii loo dabar goyn lahaa, dhallinyaraduna isaga dayn lahaayeen.

Tusaale ahaan, dalka Ingiriiska oo ka mid ah dalalka sigaarka soo saara, waxaa baakidhka lagu iibiyaa lix Dollar in ku dhow, halka dalkeenna laga ga iibsado ka ugu sarreeya hal Dollar in ka yar. Dadka ku nool dalalka horumaray ee dunida waxa ay ogaadeen halista uu sigaarku leeyahay, sidaa darteed, waxa la mamnuucay in sigaarka lagu cabbo meelaha dadweynuhu

ku kulmaan sida dugsiyada, xafiisyada iyo baabuurta intaba.Waxaa jira dad aan sigaarka cabbin oo qiiqu afka iyo sanka ba ka galo marka sigaarka agtooda lagu cabbayo, kuwaasi oo loo yaqaanno sigaar cabbayaasha aan firfircoonayn.

Kuwaasi naftooda iyana sigaarku halis buu ku hayaa, oo waxaaba la odhan karaa waa ay ka halis badan yihiin kuwa sigaarka cabba.Runtii waa wax laga naxo marka uu aabbuhu guriga ku dhex cabbayo suntan iyada ah, Miyaanu ogeyn suntan qiiqa kasoo baxaysaa in ay carruurtiisa halis ku tahay, oo ay ka qaadi karaan cudurro halis ah oo sigaarka la xidhiidha.

Halista uu caafimaadka u leeyahay ka sakow, sigaarku waa cadowga dhaqaalahaaga, waayo lacag aad wax kale oo faa'iido leh siisan lahayd ayaa aad ku iibsanaysaa sigaarkan sunta ah. Waxaa kale oo ku jira walax kale oo daroogo ah oo loo yaqaanno "Nekatiin".Walaxda Nekatiinku waxa ay sii kicisaa dhiig karka.

Nekatiinku waxa kale oo uu siyaadshaa neefsashada iyo garaaca wadnaha, taas oo qofka u keenta dhibaato xagga wadnaha ah. Nekatiinku waa waxa qofka sigaarka ku ibtileeya, oo jeclaysiiya in uu sigaarka sii badsado.

## 3.1 . Goobo geli jawaabta saxda ah adoo adeegsanaya sheekada sare

**1. Dhakhtarradu waxa ay ugu digaan dadka:**

B. In ay sigaarka marmar uun cabbaan
T. In ay joojiyaan sigarka cabbidiisa
J.In ay joogsadaan meesha lagu cabbo
X. In ay jiidhaan meesha lagu cabbo

**2. Sigaarka waxa ku jirta walxo:**

B. Sun ah
T. Sixin ah
J. Subag ah
X. Seed ah



Scanned by TapScanner

**3. Kansarka waxa ka mid ah waxa keena:**

B. Cabbitaanka sigaarka

T. Cabbitaanka soonka

J. Cabbitaanka subagga

X. Cabbitaanka sabiibka

**4. Waddada yari waxa ay** ...........................................

B. Kugu riddaa waddo dhuuban

T. Kugu riddaa waddo weyn

J. Kugu riddaa waddo qaloocan

X. Kugu riddaa waddo wadiiqo ah

**5. Cabbitaanka sigaarku waa:**

B. Ilbaxnimo

T. Caado uun

J. Cudur

X. Ceeb

**6. Sigaarku waxa uu ka mid yahay dalkeena:**

B. Badeecadaha sii gabaabsiga ah

T. Badeecadaha naadirka ah

J. Badeecadaha buuxa

X. Badeecadaha laga mamnuucay

**7. Cashuurta sigaarka waa:**

B. Qaali dalkeena

T. Dhexdhexaad dalkeena

J. Jaban tahay dalkeena

X. Kolba si dalkeena

**8. Dalalka wax ka ogaadey dhibaatada sigaarka:**

B. Waxaa laga mamnuucay meelaha laysugu yimaado

T. Waxaa laga mamnuucay meelaha loo kaadi tago

J. Waxaa laga mamnuucay meelaha bannaan

X. Waxaa laga mamnuucay meel kasta



Scanned by TapScanner

**9. Sigaar cabbaha aan firfircoonayn:**

B. Waa ninka cabba hal midh ilaa shan

T. Waa dadka cabba shan ilaa toban

J. Waa dadka daanka dhiga

X. Waa dadka lagu ag cabbo

**10. Sunta "Nekatiin" ee ku jirta sigaarku:**

B. Dadka way nacsiisaa cabbitaankiisa

T. Dadka way nasisaa wadnahooda

J. Dadka way jeclaysiisaa cabbitaankiisa

X. Dadka way niyad jabisaa.

**11. Haddii aad yaraan ku cabto :**

B. Sigaarka waad dheeraan doontaa

T. Sigaarka koriinka iyo sanbabadoodaba waa uu dhibaa

J. Sigaarka carabiga ayaad xariif ku noqon

X. Sigaarka sidii nin weyn ayaa laguu qadarin

**12. Immika dalkeena da'yartu wey :**

B. Dhintey cabbida sigaarka

T. Joojiyeen cabbida sigaarka

J. May dhimin cabbida sigaarka marka loo eego sannadihii hore

X. Kordhiyeen cabbidda sigaarka

## 3.2. Ka jawaab su'aalahan kooban

1. Magacow cudurka laga qaado sigaarka?

Kan salka sanbabado..........

2. Sheeg talo dhakhtarku bixiyey?

in ay sigaar ka daayaan..........

Dadka sigaarka cabba waa in ay joojiyaan cabbidii..........

3. Muxuu dhakhtarku u ceebeeyey sigaarka?

Waxa uu halis ku yahay caafimaadka..........

waa wax xun..........

4. Maxaa la yidhaahdaa ninka la deggan reerka uu gabadha ka qabo?

Inan layaal..........

..........



Scanned by TapScanner

5. Sheeg macnaha ereyga biyo-diid?

didan adg

### 3.3. Ka jawaab su'aalahan fidsan

1. b. Sheeg sababta uu sigaarku halis ugu yahay dadka?

sigaarka waa uu jira waa yaabo cafimadka ku halis sigaarku

t. Caddee inuu ku yahay sambabada halis sigaarku?

Nafta loo yagaan karbaan manoksayd gof kastoo cabo sanbabadii su waa ay cadaa

2. b- Sharax ka bixi sigaarka?

sigaarka waa daroogo halis ah oo cafimaadka ku halis

t. Tilmaan cad ka bixi sida ay xidhiidhka ula leedahay maahmaahdu sheekadan?

**"Balo iyo buuri toona lama waayo"**

Qofka haddii uu cadlay sto balwadah yar-yar waxay u horseedi karta mau gabatimo balwadaha ka sii

3. Sharrax buuxa ka bixi ujeeddada guud ee sheekadan?

waxa uu casharkan ka hadlay halis sigaarka

Scanned by TapScanner

Xasan Yare, waa arday dhigta dugsiga Hoose/dhexe ee tuulada Gorayo Cawl fasalka siddeedaadna ku jira. Xasan Yare, waxbarashada aad ayuu ugu dadaalaa, waxaana uu jeclaa oo caado ka dhigtay inuu sameeyo tijaabooyin uu kaga gungaadho sidii aqoonta uu baranayo ugu adeegsan lahaa nolosha, isla markaana ugu faa'iidaysan lahaa.

Xasan Yare waxa uu ka dhashay qoys beeraley ah .Baaxadda beertoodu waxa ay ka koobnayd, lix qooddi oo dherer ah, iyada oo ay qiyaasta halkii qooddi tahay laba iyo labaatan tallaabo.Waxaase ay sannad kasta tabcaan saddex marka loo qaybiyo meel ahaan, inta soo hadhana waxay u qoondeeyeen in lo'doodu daaqdo.

Xasan Yare waxa uu ku xeel dheeraa sida dibida loogu qodo beerta oo marka uu labadooda dibi ee Boorre iyo Xayle soo meeraro ee uu ku soo xidho qalabkii sida; harqoodka, irfida iyo marashida uu beerta ku qodayo, isla markaana ku luuqaynayo hees hawleedada beerta, dhallinyarada deegaanku aad bay u xiisayn jireen, waana ay ku soo ururi jireen.

Xasan Yare, waxa uu go'aansaday in uu fasaxa bisha ah ee teeramka hore ee dugsiga uu u tago eeddadii oo degenayd deegaanka degmada Qoryaale ee gobolka Togdheer si uu degaankaas aqoon uga soo korodhsado, una soo [b]arto carruurta ilma-abtiga yihiin.

[H]al caano maal bay ku qaadatay in uu Xasan Yare ku gaadho qoyskii Reer [D]ucaale, iyaga oo ku faraxsan aragtidiisa. Qoyska Reer Ducaale waxay [h]aayeen xoolo dhaqato laba tiro oo adhi iyo labaatan halaad oo geel ah [.].Sidii dhaqanka raacatadu ahaa markii xoolihii la xareeyay ayaa ardaagii [..] goglay Xasan Yare oo dhammaan qoyskii hareeraha laga soo [..]hiistay.Carruurta ay Xasan ilma-abtiga yihiin waa lix. Afarta wiil ee ugu [..]n roon waxay da'doodu u dhaxaysay 8 jir ilaa iyo 14 jir , labada hablood [u]gu yar yarina waa 3 jir ilaa 6 jir. Habeenkii hore is waraysi xiiso badan [..]saqbadhkii lagu gaadhay.



Scanned by TapScanner

Subaxdiina markii xoolihii la kala agaasimay ayuu Xasan codsaday inuu maalintaas innamada geela la foofiyo isaga oo xiisaynayay.Toddobaad markii uu la joogay ee si wacan u dersay nolosha reerka iyo deegaanka ayuu Xasan Yare, adeerkii Ducaale isaga oo goor fiid ah geela la mayracaya u soo jeediyey talooyinkan wax ku oolka ah.

"Adeer Ducaale, waxa jira laba nimco oo duleedkiina ah oo aad ka qatan tihiin" Ducaale oo horeba ula dhacsanaa fikradaha Xasan ayaa yidhi, "Adeer, maxay kala yihiin nimcooyinkaasi?"

Waa mide, halkan aan hadda joognaa waa meel masno ah oo beeraha ku fiican, in fursadaasi ay luntaana waa doqonniimo.

Waa tan labaade, degmadan reerku ag yaal ee Qoryaale, waxa ka furan dugsiyadii waxbarashada, in carruurta wax la baraana waa arin waajib ah, waana xuquuq ilmuhu leeyahay.

Ducaale aad ayuu ugu qushuucay taladii Xasan Yare, isla habeenkiina waxa si wada jir ah isula qaadaa dhigay dhammaan Xubnihii qoyska.Toddoba cisho ka dibna inantii ugu yarayd carruurta oo saddex sanno jirtay mooyaane, intii kale waxay u dareertay waxbarasho, dhulkii masnada ahaana waa la tabcay oo waxa ka soo biqlay hadhuudh.Labadii toddobaad ee ugu danbeeyey fasixiisa, Xasan waxa uu dadaal ka gaystay, sidii uu carruurta uga caawin lahaa farbarashada iyo sidii uu qoyska u fahamsiin lahaa aqoonta la xidhiidha beer qodaalka.

## 4.1. Gali goobo jawaabta saxda ah adoo adeegsanaya sheekada kor ku xusan

**1. Xasan Yare aqoonta uu dugsiga ka barto waxa uu ugu dadaali jiray:**

B. Si uu abaal marin ugu helo

T. Si uu imtixaanka ugu gudbo

J. Si uu ugu adeegsado nolosha

X. Si uu ugu farxo waalidka dhalay

©SLNECB



Scanned by TapScanner

**2. Xasan Yare waxa uu ka soo jeeday:**

B. Qoys beeralay ah
T. Qoys kalluumaysato ah
J. Qoys xoolo dhaqato ah
X. Qoys beer iyo xoolo ba leh

**3. Qoyska Xasan Yare waxay tabcan jireen sannad kasta:**

B. Saddex daloolow ka laba
T. saddex daloolow ka hal
J. Afar daloolow ka hal
X. Afar daloolow ka laba

**4. Beerta Xasan Yare waxa ay baaxaddeedu leekayd:**

B. 6 qooddi
T. 36 qooddi
J. 72 qooddi
X. 48 qooddi

**5. Sababta ay dhallinyarada deegaanku u xiisayn jireen, marka uu Xasan dibida beerta ku qodayo waxay ahayd:**

B. Isaga oo ku fiican waxbarashada dugsiga
T. Isaga oo aad u jeclaa beer qodaalka
J. Isaga oo lahaa laba dibi oo uu beerta ku qodo
X. Isaga oo xafid sanaa heesaha beer qodaalka

**6. Sababta uu Xasan wakhtiga fasixiisa u tagay degmada Qoryaale, waxay ahayd:**

B. Si uu waayo aragnimo uga soo korodhsado
T. Si uu usoo barto eddadii
J. Si uu uga soo helo dukaamaysi
X. Si uu wakhtiga fasaxa ugu soo dilo

**7. Carruurta ay Xasan ilmaabtiga ahaayeen, waxay isugu jireen:**

B. Afar hablood iyo laba wiil
T. Saddex wiil iyo saddex hablood
J. Afar wiil iyo saddex hablood
X. Afar wiil iyo laba hablood


©SLNECB
Scanned by TapScanner

**8. Xasan waxa uu ku gaadhay Reer Ducaale wakhti dhan:**
B. 24 saacadoood
T. 12 saacadood
J. 36 saacadood
X. 6 saacadood

**9. Codsigii Xasan ee ahaa, inuu wiilasha geela la foofsho, ujeedada uu ka lahaa waxay ahayd:**
B. Inuu helo fursad uu wiilasha kula sheekaysto
T. Inuu ka soo dhergo caano geel
J. Inuu soo korodhsado aqoon iyo waayo aragnimo
X. Inuu hawsha reerka ka qayb qaato.

**10. Xasan waxa ku dhaliyay talada uu reerka siiyay:**
B. Isaga oo ka naxay nolosha ay eddadii ku jirtay
T. Isagoo doonayay in qoysku nolol horumar leh ku tallaabsado
J. Isagoo doonayay in qoysku arko aqoontiisa
X. Isagoo arkay dayaca iyo macaluusha ka muuqatay caruurta

## 4.2. Su'aalo kooban iyo su'aalo fidsan

**B. Su'aalo kooban.**

**1.** Immisa tiro bay ka koobnaayeen xoolaha Ducaale?

~~laba iyo labaatan~~ ~~laba iyo~~ [illegible]

**2.** Qor laba arimood oo uu Xasan yare ka gaystay dadaal intuusan ka soo anba bixin Reer Ducaale?

In ay kaa faa'iidaysan dhaliso masnada ah ee [illegible]
In carruurta wax la baro

**T. Su'aalo fidsan.**

**1. Xasan Yare laba talo oo wax ku ool ah ayuu siiyey reer Ducaale.**

b. Ka bixi sharrax sida ay mustaqbalka labadaas talo ay saamayn ugu yeelanayaan nolosha qoyska?

**Talada hore:**

..................................................................................................

..................................................................................................

..................................................................................................

Scanned by TapScanner

# 5. Goobo gali aan curis lahayn

## 5.1. Goobo geli jawaabta ugu saxsan

**1. Noocyada dhirta ee dhismaha loo isticmaalo waxa ka mid ah:**

B. Dayibka, dhebiga, xamakowga
T. Baxarasaafka, qudhaca iyo gacayrta (gacayrada)
J. Maygaaga, dayibka iyo baxarasaafka
X. Qudhaca, galoolka iyo maroorada

**2. Noocyada dhirta ee dawada loo isticmaalo waxa ka mid ah:**

B. Morohda, dayibka iyo galoolka
T. Dacarta, waabayga iyo dayibka
J. galoolka, dacarta iyo maraaga
X. Dayibka, qabada iyo hohobta

**3. Uga door meesha bannaan erayga ku habboon.**

**Laanta __________ baa ay fuusha shinbirtu:**

B. Dheer tahay
T. Dheeraan
J. Dheereyn
X. Dheer

**4. Noocyada dhirta ee laga sameeyo weelka waxa ka mid ah:**

B. Maygaag, qabo iyo gob
T. Moroh, ubbo iyo qabo
J. Xagar, galool iyo qabo
X. Qabo, moroh iyo moxor

**5. Baahida aasaasiga ah ee bulshada waxa ka mid ah:**

B. Tv-yada iyo tilifoonada
T. Beeraha iyo dhismaha daaraha
J. Biyaha iyo caafimaadka
X. Waxbarashada iyo dayuuradaha



Scanned by TapScanner

**6. Wakhti kaa tegay tiigsimaad ma leh dulucda maahmaahdani waa:**

B. In waqtiga soo socda laga faa'iidaysto

T. In waqtiga ku dhaafey aad gadaal ka buuxiso

J. In wakhtiga uu soo noqdo

X. In wakhtigu ku dhaafey uuna u soo noqoneyn

**7.** Ereyga **sidig** macnihiisu waa

B. Hasha nirigteedu dhimatey ee haraga lagu maalo

T. Hasha aan sida fudud loo maali karin ee dhibta badan

J. Hasha nirig aaney dhalin lagu tolo

X. Hasha hebedka ah ee nirig kastaa ay jaqdo

**8.** Macnaha areyga **haaneed** waa:-

B. Dhinaca ay nirigtu hasha ka jaqdo

T. Dhinaca midigta ee hasha laga liso

J. Dhinaca uu ka liso ninkaa aan sidin hadhuudhka [gorofka, hadhuubka]

X. Dhinaca hasha lagala galo hadhuubka [gorofka, hadhuubka]

**9. Ereyadan kuwee baa magacyo ah:**

B. Tag, joog iyo baso

T. Jiifaa, yey iyo loox

J. Jiifey, seexday iyo cunay

X. Seexo, toos iyo jiis.

**10. Ereyadan sanduuqan ku jira waa:**

| |
|---|
| **Kayga, kiisa, kooda, keeda, keenna, kuwooda, iyo kuweenna** |

B. Magaca – u – yaal lahaansho

T. Magaca – u – yaal tilmaameed

J. Xidhiidhiyaal

X. Meeleeyayaal

**11. Faa'iidooyinka luuqadda waxa ka mid ah:**

B. Ku wada xidhiidhka iyo is maan-dhaaf

T. Isku raali gelinta iyo is-af-garan waaga

J. Ku cabbirka af-kaarta iyo fikrad is-weydaarsiga

X. Ku dhalinta khilaaraafaadka iyo samaynta naqshadaha.



©SLNECB

Scanned by TapScanner

**12. Deriskaagu waa ilaalo aan laguu diran. Ujeeddada maahmaahdani waa:**

B. Deriskaagu waa cadaw

T. Deriskaagu waa kuu ciidan

J. Deriskaagu waa diradiraale

X. Deriskaagu waa ogyihiin xogtaada

**13. Xabagta malmalku waxa ay ka baxdaa geedka la yidhaahdo :**

B. Dhiddin

T. Moxor

J. Galool

X. Xagar

**14. Sababta malmalka guryaha loo dhigtaa waxa weeyi :**

B.Maska ayaa jecel urtiisa

T. Maroodiga ayaa ka xanaaqa

J. Martida ayaan la soo marin

X. Maska ayaa ka carara urtiisa

**15. Caadooyinka guurka ee sii dabar-go'aya waxa ka mid ah :**

B. Heerin

T. Dumaal

J. Geed –fadhiisi [Ardaa-dhig]

X. Xigsiisan



Scanned by TapScanner

Meelaha kale ee ay soo mareen ... geedkii sare ka xoolaha loo foofiyo oo sidii dhuxusha looga shidanaayey idlaaday, waxa ay arkeen galoolkii oo gurmo go'an laga dhigay iyo dhirtii damalka ahayd oo geed-geed qudhac ah oo teel-teel ahi ka hadheen.

Waxa kale oo ay la dhaygageen deegaanka laftiisa oo aan dugsi waxbarasho ku oolin markii ay ogaadeen. Waxa ay ka doodeen sidii loo daryeeli lahaa deegaanka iyo sidii wax looga qaban lahaa dhirta sii dabar go'aysa ee dhuxusha lagu idleeyey.

"Biyo koday u dhacaan hadalna danbuu u go'aane" aqoon korodhsigii deegaanka iyo dal-xiiskii kolkii ay dhamaysteen waxa ay la kulmeen odayaashii iyo maamulkii deegaanka miyiga, halkaana ardeydu waxa ay uga soo jeedisay hadalo talooyin iyo mahad celin isugu jira.

Talooyinkii ardeydu soo jeedisay kolkii ay qaateen maamulkii deegaanku, waxay ku kala baqooleen ballan iyo in ay isu soo noqdaan kal dambe si ay u ogaadaan sida ay uga midho dhaliyeen talooyinkii ay soo jeediyeen.

## 6.1. Goobaab jawaabta ugu saxsan adoo adeegsanaya sheekada kor ku xusan

1. **(Cirku waa uu tusan yahay) waxa looga jeedaa:**
   - B. Cirku daruur baa uu leeyahay
   - T. Cirku caad baa uu leeyahay
   - J. Cirku siigu leeyahay
   - X. Cirku daruur malahayn

2. **(Naqii hore) waxa looga jeedaa:**
   - B. Rayskii hore
   - T. Ramadkii hore
   - J. Roobkii hore
   - X. Sannadkii hore

3. **Guure waxa uu ahaa:**
   - B. Mid ka mid ah odayaashii deegaanka
   - T. Mid ka mid ah waalidka dugsiga
   - J. Mid ka mid ah odayaasha dal-xiiska
   - X. Mid ka mid ah odayaasha dalka

Scanned by TapScanner

**4. (kal-dambe) waxa looga jeedaa:**

B. Subax dambe
T. Saadaal dambe
J. Sannad dambe
X. Salaad dambe

**5. (Xareeddu mulacyeysay) waxa looga jeedaa:**

B. Daad ku jiifsaday
T. Daad ku qaatay
J. Daad ku qooyey
X. Daad ka soo rogmaday

**6. (Dhulka doogsaday) waxa looga jeeda:**

B. Dhulku barwaaqoobay
T. Dhulku balaadhay
J. Dhulku basaasay
X. Dhulku boodhoobay

**7. Sidka geelu waa:**

B. Saddex boqol iyo saddex habeen
T. saddex boqol iyo sagaashan habeen
J. Saddex boqol iyo soddon habeen
X. Saddex boqol iyo siddeetan habeen.

**8. (Hor-weyn) waxa looga jeedaa:**

B. Geela dhalay
T. Geela gudhay
J. Geela waaweyn
X. Geela irmaan

**9. (Faraqa laalaadisay) waxa looga jeedaa:**

B. Xaynka jiiday
T.Ubax yeelatay
J. Curub laalaadisay
X. Caleemo cusub bixisay

**10. Meelaha ardeydu ay dal-xiiska ku soo mareen waxa ka mid ahaa:**

B. Beeraha
T. Buuraha
J. Balliyada
X. Dhirta

**11. (Teel-teelka) waxa looga jeedaa:**

B. Dhir badan
T. Dhir kala fog fog
J. Dhir cufan
X. Dhir la'aan



Scanned by TapScanner

**12.(Carro-san) waxa looga jeedaa:**

B. Dhul beerashada ku fiican
T. Dhul dalxiiska ku fiican
J. Dhul daawashada ku fiican
X. Dhul dabbaalashada ku fiican

**13. (Gurmo go'an) waxa looga jeedaa:**

B. Dhirtii oo la gubay
T. Dhirtii oo la daaqay
J. Dhirtii oo la daawaday
X. Dhirtii oo la jaray

**14. Xilliga ardeydu dal-xiiska ay u baxeen waxa uu ahaa:**

B. Xagaa
T. Kaliil
J. Gu'
X. Jiilaal

**15. Dal-xiisku ardeydu waxa uu ahaa:**

B. Mid ay ka faa'iidaysteen ardeydu
T. Mid ay ka faa'iidaysteen deegaankii
J. Mid ay ka faa'iidaysteen macalimiintu
X. Mid ay ka faa'iidaysteen labada dhinacba.

Scanned by TapScanner

## 6.2. Ku buuxi meelaha banaan ereyada ku jira sanduuqa.

| Kaneeco | Sigaarka | Qalanjo | Malaariya | Hays |
|---|---|---|---|---|

1. Qalanjo waa maroodiga dhedig
2. Cudurka ay keento kaneecadu waxa la yidhaahdaa Malaariya
3. Sigaarka waa buuri sun ah
4. Qalooca kuruska geela waxaa layidhaahdaa Hays ayuu leeyahay
5. Duumadu waa cudur ay keento Kaneeco

## 6.3. Su'aalo kooban iyo su'aalo fidsan

1. Qor afar faa'iido oo ay soo korodhsadeen ardaydii dal-xiiska ku tagtay deegaanka miyiga ?

waxaay soo bartee guruxdaxoolaha dhirka iyo dhudegaanka miiguree yahay wakutiga gu'ga laguJiro

2. Ka faallood dhibaatooyinka iyo dayaca ay ku soo arkeen ardaydu deegaanka miyiga, adiga oo mid mid uga faaloonaya ?

# Cutubka 7aad: Geel-badane ...

Warfaa waxaa uu ahaa Ina Warsame Geeddi, wuxuuna ku dhashay meel hawd guntii ahayd oo harooyinka aad uga durugsanayd.Iyada oo ay beeshu guri-baqwaaqo deggan tahay, duqeydu shir iyo sheeko ku baraad la'dahay.Dhalinyaraduna xarrago iyo haasaawe guryaha dhexdooda temeshlaynayaan ayaa uu jiilaal dillaacay.Qaydaradii biyuhu waa ay gudheen, baadna wuu qallalay, xoolihii dulin baa ku dhashay.Dad iyo duunyana waxa ay nafta kula eerteen dhacarasho.Dhaanku waxa uu dhixi jirey lix caano-maal oo dhalan-dhool ah.Inkasta oo dhoon-horaaddada iyo dhoon-dambeeddada la soo dhaamiyona, kolleyba dhiillo harraad baa la qabay.

Warfaa habeen "koxdin awr" buu dhashay, kolkiiba dhibaatada adduun ayuu la kowsaday.Dhibta iyo omoska jiilaal ka sokow reerku xoolo badan ma lahayn, sidaa darteedna wiilku daryeel fiican ma helin.Hal sanno markii uu jirey, ayaa uu aabbihii hooyadii furay. Inkasta oo inay curadkeeda qaadato ku dadaashay, haddana hangool buu Warsame wiilkii kaga reebay. Iyada oo dereen-wadayaasha iyo dubaaqaba ka murugaysan, jaaqdii ilmaheeduna xanuun iyo caloolyow ku sii kordhisay, iyada oo dhaqaaq joogsanaysa, haddana sidii ay cidi u naxariisanayso waxay dib soo jalleecdaba, waxa ay ka dhaqaaqday beerkeedii iyo baradeedii intaba.

Gurigii intaan laga guurin, ayaa uu Warsame aqalkii madoobaa iyo oohintii ilmaha u adkaysan waayey.Waxa uu tebay dugsigii iyo daryeelkii sida uu Warfaa naaskii hooyadii iyo goshii ay huwin jirtey u waayey.Caloolyow iyo isciilkaambi baa Warsame la soo dersay. Waxa uu goostay in uu bal mar labaad guursado.Waxa uu gabdhihii beesha joogay ilaalada ka meeriyaba, waxa uu galabtii dambe la kulmay inan awr carraabineysey. Waxa ay soohaneysey xadhig geeddi ahaa, oo ay rabtey in ay caws ka samaysato, goshana waxay ku sidatay maydhax, xidhmo maadh ahna waa ay xambaarsanayd. Maro saddex qayd ah, boqor darayo muus ah iyo dhacle xabbad-qaad leh ayay inantu ku jookhnayd.Intaa waxa weliba usii dheeraa, qool cunnaabi ah iyo jijimo. Warsame inta uu gabadhii isla taagey bu





Scanned by TapScanner

bariidiyey ka dibna wuxu ku yidhi ; "Naa waxaan ku weydiiyey, awrtu gurigee bay ku carraabaysa?" Inta ay geed dhafaruur ah dhinaca kale sidii qof dhuumaalaysanaya ka martay ayey ku tidhi; "Oo adigu yaad rabtey" Intii aanu jawaabin, bay indhaha hoos u rogtay, oo ay daymo xishood ilqoodha Warsame kaga xadday.

Inta uu labada lugood is dhaafsaday, hangool uu siteyna taageertay buu isaga oo qosol dhoolla caddayna yidhi; "Haweenow, idinku ilaa Xaawiyo Aadan ma jikaar uun baydun wadi?" jawaab kama uu sugin, geedkii dhinacii ay ka taagnayd inta uu ugu wareegay, ayuu fool-ka-fool gabadhii isu hor taagay, oo dhammaanteed kor iyo kal isha ka meeriyey, dhexda madagta ah, ilkaha dhayda ah iyo cirridka dhuxusha ah, baa dhammaantood dhaayihiisa soo jiitay. Sanqaroorka toosan, sunniyaasha geeraaran iyo sansaanka wejigeeda nin arkay mooyaane, nin kale loogama sheekayn karo.Dhaygag iyo amakaag isaga oo dhabannada haysta, welina aanay sheeko iyo haasaawe badani u kala bixin bay yeedhi dhinaca bari ka baxday. "Naa Cambarooy, maxaad awrta u soo carraabin wayday ee kugu dhacay?" Warsame oo wadnuhu fugtaa hayo, ogaadeyna in ay gabadhu Ina Samatar Oogle ahayd iyo Cambaro oo firkanaxsan baa midba gees u dhaqaaqay.

Warsame ileen xoolo ku filan ma lahayne, inta uu xigtadii ku dhex dhacay buu yidhi; "Waar inaan gabadhii hore kala tagnay waad la socotaan, ninkii Warfaa Yare na tunka kuma sidi karo, immika iyo haddana, in aan Samatar Oogle la xididaa baan damcay, xoolana waad i og tihiin, laba arrimood wax ha la igala qabto". "Waa ta hore'e, Samatar Oogle ha la iila geed-fadhiisto, waa ta dambe'e, gabadh ha la igala yarad bixiyo."Iyada oo lagu dhaliilay in ooridiisi hore xilkas darro uu ku furay, wax ma dhaqdena yahay, ayaa markii hore in aan wax kaalmo ah loo geysan la goostey. Hase yeeshee Kulane oo nin duq ah oo dad wadeenna ayaa ku taliyey; "Waa in aan maanta Warsame baahida lagaga tegin ee wax la taro".

"Waar bowdyo rag maalinba mid baa qaawane, ninkaa gebagebeeya" Arrintii waxa la sii gorfeeyaba, in Warsame gacan la siiyo buu go'aankii ugu dambeeyey noqday.



Scanned by TapScanner

7.1. Goobaab jawaabta saxda ah...

**1. Warfaa waxa uu ku dhashay:**

B. Meel ka mid ah magaalada Burco
T. Meel ka mid ah magaalada Boorama
J. Meel ka mid ah magaalada Hargeysa
X. Meel hawd guntii ah

**2. "Beeshu waxa ay ku baraad la'dahay" waxa looga jeedaa:**

B. Waxay ku maqan tahay
T. Waxay ku mashquulsan tahay
J. Waxay ku minowsan tahay
X. Waxay ku maadsataa

**3. Dhallinyarada oo xarrago iyo haasaawe guryaha dhexdooda temeshlaynaysa :**

B. Ayaa jiilaal ballaadhay
T. Ayaa jiilaal balanbaliyey
J. Ayaa jiilaal dilaacay
X. Jiilaal baxay

**4. Warfaa wuxuu dhashay :**

B. Koxdin-Geel
T. Koxdin-Diin
J. Koxdin-Cawo
X. Koxdin-Awr

**5. Dhibaatada iyo omoska jiilaalka ka sokow :**

B. Reerku xoolo ma lahayn
T. Reerku xoolo badan ma lahayn
J. Reerku xoolo yar ma lahayn
X. Reerku xoolo iyo lacag ma lahayn

**6. Warsame Aabihii wuxuu hooyadii furay :**

B. Hal sano markii uu jirey
T. Hal habeen markii uu jirey
J. Hal sano iyo maalin markii uu jirey
X. Hal sano iyo bil markii uu jirey

Scanned by TapScanner

**7. Warsame aqalkii madooba iyo oohintii :**

B. Ayaa uu ka baqay
T. Ayaa uu u adkasyan waayey
J. Ayaa uu maqlay
X. Ayaa uu diiday

**8. Warsame waxa uu goostay :**

B. In uu bal mar labaad guuro
T. In uu bal mar labaad guureeyo
J. In uu bal mar labaad guursado
X. In uu bal mar labaad gudoomo

**9. Warsame waxa uu galabtii dambe la kulmay :**

B. Inan awr carraabinaysay
T. Inan awr carraynaysay
J. Inan awr seetaynaysay
X. Inan awr daajinaysay

**10. Inantu waxay soohanaysay :**

B. Xadhig gaaban
T. Xadhig galool ah
J. Xadhig gumar ah
X. Xadhig geeddi ahaa

**11. Warsame inantu :**

B. Way ka xanaaqday
T. Way ka xishootay
J. Way ka xidaaraysatay
X. Way ka xoolo dhaqatay

**12. Warsame ooridiisi hore :**

B. Xil-kas-daro ayuu ku furay
T. Xanuun ayuu ku furay
J. Xilo-jacayl ayuu ku furay
X. Xilo-xumaan ayuu ku furay

Scanned by TapScanner

**13. Warsame waxa uu taageertay :**

B. Hub uu sitey
T. Harag uu sitey
J. Hangool uu sitey
X. Hadhuub uu sitey

**14. Kulane waxa uu ahaa :**

B. Nin duq ah oo dad wadeen ah
T. Nin doqon ah oo dumar badan
J. Nin dabeecad xun oo doqon ah
X. Nin degan

**15. Kulane waxa uu ku taliyey :**

B. In aan baahida lagaga tegin oo la tudho
T. In aan baahida lagaga tegin oo wax la taro
J. In aan baahida lagaga tegin oo la tiiriyo
X. In aan baahida lagaga tegin oo la toosiyo

**16. In Warsame gacan la siiyo :**

B. Ayaa go'aankii hore noqday
T. Ayaa go'aankii dhexe noqday
J. Ayaa go'aankii noqon waayey Safarka Iyo
X. Ayaa go'aankii u dambeeyey noqday.

Scanned by TapScanner

# Cutubka 8 aad: Xeerkii Maganta Soomaalida 2013

Dadkii Soomaalida ahaa ee qarnigii 19-aad noolaa kumay faanayn gaadiid dheereeya oo ay isugu tagaan. Gaadiid faras iyo rakuub dhaafsiisan may lahayn, hase ahaatee waxba iskumay seeganayn.

Baabuuro iyo dayuurado yaan la haysan oo ha la kala fogaadee war baa la isu hayey. Beelo kolba xasaradi dhex gasho ha la ahaadee, haddana xidid iyo qaraabo ayaa la ahaa.Waa la isu socon jiray oo lama kala seerrayn. Saqiir – gawrac maalintii aanu jirin, waa la is bixin jiray, oo waa la is ammaan gelin jiray. Fadaqa **(fidmo wade)**yeelkiise , xeer iyo dhaqan ayuu dadku lahaa oo wax ku kala qaadan jiray.

Ganacsi aan lacag la aqoon ayaa lagu macaamili jiray oo xeebaha iyo dhulka ka fogi xidhiidh bay lahaayeen. Geyiga soomaalidu degto intiisa badan Saaxil baa magaalo u ahayd. Doonyo shixnadan oo Hindiya iyo dalalka Carbeeb laga soo raray ayaa ku soo xidhan jiray.Maxay sidaan?Timir, dhar, irbado dharka lagu tosho iyo badeecooyin kale oo waagii la joogaba raacatadu bandarrada uga baahan tahay.

Ganacsatada reer Saaxil waxa ay badeecadahaas ku rari jireen awr rag gadhka hayo oo (KABADHE) loo yaqaan oo imaatinkooda la dhowraayo oo laga dhursugaayo. Safarradaas oo tegi jiray miyiga xeebaha ka durugsan, si waxa ay sidaan ugu soo beddeshaan baalka goroyada, malmalka, gadh-ceesaanka, gaashaammada iyo hadba wixii reer Saaxil abdo u leh ee ay dibedda u dhoofsanayaan amaba ay lafahooda u doonayaan.

Is dhex markaasi ma tabaalo la'ayn.Dadku godobo raagay ayuu kala qabaa. Ciidamo qabaa'ilka u dhexeeya oo ammaanka qofka iyo hantidiisa dhowraa ma jirin. Dawlad uu dhagar-qabuhu ka baqaa iyaduna dalka kama abuurnayn. Haddaba yaa u damiin ah ninka Saaxil kasoo safra ee deegaamada ka durugsan u soo kicitama? Ruuxa iyo xoolihiisa tolka ayaa difaacoodu saarnaa. Ninka tolkiisii ka yimid ee badeecadda baahida loo qabo



©SLNECB

Scanned by TapScanner

beelaha kale la dhex- gooshaaya yaa haddaba looga cabsanayaa oo daraaddii lagu nabad-gelinayaa?

Soomaalidii hore arrintaas iyada ah kamay il duufin. Waxay u soo rogeen wax "MAGAN" la yidhaahdo oo ka mid ah tiirarka ugu waaweyn ee xeerkeenii hore ku taagnaa. Ninka safarka ahi kolkii uu Saaxil ka soo ambabaxo wuxuu soo sheegan jiray deegaanka uu ku socdo nin magac ku leh. "Hebel buu safarkaygu ku socdaa" ayuu odhan jiray.Hebelkaas oo ka mid ah ragga awoodda iyo maamuuska ku leh tolka uu safarku maalintaas ku socdo.

Hebelkaas oo kale waxay maradu ka dhacdaa, inantiisuna ku guur weydaa marka ninmagan u ah la dilo ama safarkiisa la dhaco ama waxyeelo la gaadhsiiyo, dabadeedna wuu ka gardhigan jiray oo geeri ka xigi jiray.

Maganta wax la yeelaa waxa ay ahayd dhalleeco iyo bar madow oo ku ooli jirtay qoyska ama ninka la magansaday ee magantiisa bixin waayey. Su'aashu se waxay tahay yaa magan noqon jiray?Waxa noqon jiray safarka, inan-la-yaalka xididkiisa la deggan,martida caawa kuusoo hoyatay ee ardaayadaada jiifta iyo ergeda kuu soo socdaashay ee qardoofooyin hore oo idin kala dhex yaalay meel-isla-dhigiddooda kuugu soo cago dhigatay.

**8.1. Goobaab jawaabta saxda ah adoo adeegsanaya sheekada kor ku xusa**

**1. Soomaalidii hore arrintaa iyada ah (Kamay il-duufin) waxa looga jeedaa**

B. May aqoonin
T. May ka tashan
J. May ka habaabin
X. May ku degdegin

**2. (Isdhex markaasi ma tabaalo la'ayn) waxa looga jeedaa**

B. Ma dhaqaale la'ayn
T. Ma dhaqaale badnayn
J. Ma dhegxumo la'ayn
X. Ma dhibaato la'ayn

Scanned by TapScanner

3. **Waxa lagu macaamili jiray**
   B. Ganacsi aan lacag la aqoon
   T. Ganacsi aan suuq lahayn
   J. Ganacsi aan saylada lahayn
   X. Ganacsi aan cashuur lahayn
4. **Saqiir – gawrac maalinta aanu jirin**
   B. waa la is dili jiray
   T. waa la is ammaani jiray
   J. waa la is ammaan gelin jiray
   X. waa la is xoogi jiray
5. **" wixii reer saaxil abdo u leh" waxa looga jeedaa**
   B. Wixii Reer Saaxil faa'ido u leh
   T. Wixii Reer Saaxil laga dhaxlo
   J. Wixii Reer Saaxil faa'ido u leh
   X. Wixii Reer Saaxil loo dhoofiyo
6. **Geyiga soomaalidu degto intiisa badan**
   B. Boorama ayaa magaalo u ahayd
   T. Burco ayaa magaalo u ahayd
   J. Badhan ayaa magaalo u ahayd
   X. Saaxil ayaa magaalo u ahayd
7. **Dadkii soomaliyeed ee qarnigii 19-aad noolaa gaadiidkoodu waxa uu ahaa**
   B. faras iyo baqal
   T. faras iyo rakuub
   J. faras iyo dameer
   X. faras iyo baabuur
8. **"Bandarrada" waxa looga jeedaa:**
   B. Magaalooyinka
   T. Maagalada Saaxil
   J. Magaalada Hargaysa
   X. Miyo iyo magaalo



©SLNECB

Scanned by TapScanner

9. **Ragga ganacsatada ah waxa loo yaqaanay**
   B. kabadhe
   T. kalkaaliyayaal
   J. kabadhle
   X. Karinle
10. **Beelo kolba xasaradi dhexgasho ha la' ahaadee**
   B. Xidid iyo qaarabana waa la'ahaa
   T. Xurmo iyo xeerba waa la' ahaa
   J. Xididna waa la'ahaa
   X. Xeer iyo xaagaanna waa la'ahaa
11. **"lama kala seerrayn" waxa looga jeedaa**
   B. Lama kala fogayn
   T. Lama kala oodnayn/lama kala xidhayn
   J. Lama kala badnayn
   X. Lama kala qarsoonayn
12. **Ninka safarka ahi kolkii uu Saaxil kasoo amba-baxo**
   B. Wuxuu soo sheegan jiray deegaanka uu ku socdo nin magac ku leh
   T. Wuxuu soo sheegan jiray gudoomiyaha golaha deegaanka
   J. Wuxuu soo sheegan jiray xog hayaha deegaanka
   X. Wuxuu soo sheegan jiray magaca qoyskiisa
13. **Baabuuro iyo dayuurado yaan la haysan oo ha la kal fogaadee**
   B. War la isuma hayn
   T. War lama kala qaadan jirin
   J. Warbaa la isu hayey
   X. War iyo wacaal la isuma hayn
14. **"Hebelkaas waxay maradu ka dhacdaa" waxa looga jeedaa**
   B. Waxay maraud ka madhataa
   T. Waxay ceebi raacdaa
   J. Waxay dhibaato ku dhacdaa
   X. Waxay maradu ka yaraataa

Scanned by TapScanner

15. **Maganta oo wax la yeelaa waxay ahayd**

B. Bar ku ooli jirtay qoyska ninku ka dhasho

T. Bar ku ooli jirtay qof kasta

J. Bar madow oo ku ooli jirtay qoyska ama ninka la magansaday

X. Bar madow oo ku ooli jirtay qoyska ama qofka la dhacay

16. **Ciidamo qabaa'ilka u dhexeeya oo ammaanka qofka iyo hantidiisa dhawraa waagii hore**

B. Way jiraan

T. Way jireen

J. Ma jiraan

X. May jirin

17. **Ninka magantiisa haddii la dilo**

B. Inantiisa lama guursan jirin

T. Inantiisa lama gelbin jirin

J. Inantiisa lama gardaadin jirin

X. Inantiisa lama gooli baadhi jirin

18. **Ruuxa iyo xoolihiisa waxa difaaci jiray**

B. Tolkiisa iyo deriskiisa

T. Tolkiisa iyo ciidanka ammaanka

J. Tolkiisa iyo inamadiisa

X. Tolka

9. **Safarradu waxa ay tegi jireen**

B. Miyiga xeebaha ka durugsan

T. Magaalooyinka xeebaha ka durugsan

J. Magaalooyinka iyo miyiga

X. Magaalooyinka

. **Fadaqa yeelkiisu dadku wuxuu kala lahaa**

B. Xeer uu xoolaha ku qaybsado

T. Xeer hoosaad aan qornayn

J. Xeer iyo dhaqan uu wax ku qaybsado

X. Xeer iyo xaagaan

Scanned by TapScanner

21. **Ergadu waxay ka mid tahay**
   B. Madax dhaqameedka
   T. Maal gabeenada
   J. Maganta
   X. Muruq maalka

22. **Gadh-ceesaanku waxa uu ka mid ahaa**
   B. Safaradu waxyaabihii ay badeecaddooda ku soo bedelan jireen
   T. Safaradu waxyaabihii ay iibin jireen
   J. Safaradu waxyaabihii ay amaahan jireen
   X. Safaradu waxyaabihii ay jeclaayeen

23. **Martidu waxa ay ka mid tahay**
   B. Maatida
   T. Maganta
   J. Madax- dhaqameedka
   X. Muruq-maalka

24. **Safaradu ninka ay soo sheegtaan waxa uu ahaa**
   B. Nin tolkiisa magac ku leh
   T. Nin tolkiisa ugu xoolo badan
   J. Nin tolkiisa ugu xoog weyn
   X. Nin tolkiisa ugu xarago badan

25. **" la dhex gooshay" waxa loog jeedaa**
   B. La dhex fadhiya
   T. La dhex taagan
   J. La dhex socda
   X. La dhex jiifa

26. **"kuugu soo cago- dhigatay" waxa looga jeedaa**
   B. Kuugu timid
   T. Kuugu soo carartay
   J. Kuugu soo fadhiisatay
   X. Kuugu soo carrawday

Scanned by TapScanner

**27. Tiirarka waa weyn ee xeerkeenii hore ku taagnaa waxa ka mid ahaa**

B. Madax dhaqameed ka
J. Maganta
T. Muruq maalka
X. Magta

**28. Ninku reerka uu ka guursado haddii uu I dego waxa loo yaqaan**

B. Xidid
J. Xurmo
T. Xigaalo
X. Inan la yaal

**29. " Doonyo shixnadan" waxa looga jeedaa**

B. Doonyo madhan
J. Doonyo gaabiya
T. Doono dheereeya
X. Doonyo buuxa

**30. Ninka maganta usoo hayataa la ' dilaa haddii uu yahay nin tolkiisa maamuus ku leh**

B. Waa la eedi jiray
J. Waa la ammaani jiray
T. Waa lala dagaalami jiray
X. Waa lala doodi jiray

## 8.2. weydiimo

1. Qor waxyaabihii safaradu ay ku soo bedelan jireen badeecadahooda?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

2. Muxuu ahaa xeerkii Magantu?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

3. Yaa noqon jiray Maganta?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

Scanned by TapScanner

## Cutubka 9 aad: Fardaha Soomaalida – 2013

Waxa la yidhi oday fardo dhaadhi ah oo indhoole ah iyo wiil uu dhalay baa is raacay goor habeennimo ah iyaga oo doonaaya in ay fardo soo dhacaan ama xadaan, waxay wataan labo jare, waxay yimaaddeen xero wegan fardo ahi ku jiraan, raggii lahaana aqallada hurdaan.

Odaygii baa wiilkii ku yidhi, " Maandhow guulayso oo xerada gal waxaad fardaha dhexdooda ka eegtaa faras Baroor ah, jilbo madow oo badhtamaha xerada taagan." Inankii baa yidhi," Aabbe waa hayaa". Maandhow jaraha inoogu qabo. Odaygii baa haddana inankii ku yidhi," Maandhow bal waxaad eegtaa faras isna afarta jilib madow,Baroor ah, oogada cad oo xerada raarteeda dambe taagan oo oodda qoobka ku xoqaaya". Inankii baa yidhi,"aabbe kaana waan hayaa". Maandhow isagana jaraha inoogu qabo.

Labadii faras bay la bexeen, cabaar kolkay socdeen ayaa odaygii inankii ku yidhi," Maandhow meel dixi leh ina gee aan fardah mirnee.

Siday fardihii u miraynayeen ayaa inankii odaygii ku yidhi," Aabbe waagii dhaw yahay". Kolkaasuu ugu jawaabay " Aabbe meel dareemo leh ina gee aan fardaha ugu luqluqnee". Dabadeedna waxa fardihii la geeyay meel dareemo leh.Kolkaasuu inankii yidhi," Aabbe waagii baa baryay". Odaygiibaa haddana yidhi," u kaadi farduhu dixi bay mirteene , dareemada hays kaga rogaane. Waagii baa baryay , qoraxdii baa soo baxday, fardihiina way xasileen inankiina odaygii buu la yaaban yahay. Raggii fardaha laha aroortii bay dareemeen in xalay fardihii la bawd furay, jarahaa la booba kolkaasaa raadkoodii lagu dhacay.

Inankuu iyo aabbihii iyaga oo barqinkii labadii faras weec-weecinaaya ay sheedda la iska arkay. Odaygii iyo inankii labadii faras bay kala fuule cagahay wax ka dayeen, raggii fardaha lahaana way ka daba tageen.

Cabbaar haddii la is eryanaayey ayuu inankii gadaal eegay kolkaasuu yi Aabbe laba faras oo cad cad baa fardaha ina eryanaaya u soo horree

Scanned by TapScanner

Kolkaasuu odaygii ku yidhi,'' faraska caddi waa Qaaje oo cadceedda wax kuma arkee xagga qorraxda inoo jeedi''.

Sidii odaygii sheegayay ayey noqotay. Labadaasina way hadheen, sidii oo kale haddii loo daba socday ayuu haddana inankii gadaal eegay oo yidhi, '' Aabbe waxa soo muuqda laba faras oo Xamarro ah'', kolkaasuu odaygii yidhi,'' Maandhow xamarku dhirta kama baxo ee kaynta inagu du ''. Labadaana kayntii baa reebtay.Barqadii hadday tahay ayuu haddana inankii meel fog ka arkay laba faras oo Ashkirro ah, kolkaasuu haddana odaygii yidhi, '' Maandhow Ashkirka dhagaxa ayaa u darane xagga buurta inoo leexi''. Sidii bay noqotay, mar dambe oo ay duhur dabadii tahay ayaa waxa soo baxay labo la mid ah kuwii ay fuushanaayeen oo laba Baroor ah.

Kolkaasuu odaygii haddana yidhi, '' Maandhow cagta u rog ninkii intuu xalay Dixi miray, waaberigiina Dareemo ugu luqluqay ayaa ku lehe. Sidii odaygii sheegay bay arrintii ku dhammaatay.

Labadii farasna way la baxsadeen iyaga oo raggii raacdada ahaana habaaska ku reebay.

**9.1.Goobaab jawaabta saxda ah adoo adeegsanaya sheekada kor ku xusan**

**1. Jaruhu waa:**

b) Qalab beeraha lagu qodo.

t) Qalab berkedaha lagu qodo

j) Qalab fardaha lagu fuulo

x) b iyo j

**2. Faraska aan kaynta ka bixin waxa la yidhaahdaa:**

b) Faras cad

t) Faras madow

j) Faras Casuus ah

Scanned by TapScanner

**3. Faraska aan dhagaxa marin waxa la yidhaahdaa:**

b) Bulaale

t) Ashkir

j) Caynab

x) Dhammaan

**4. Faraska aan cadceeda wax ku arkin waxa la yidhaahdaa :**

b) Xamar

t) Walhad

j) Ashkir

x) Qaaje

**5. Faraska fardaha ugu dheereeya waxa la yidhaahdaa :**

b) Baroor

t) Xamar

j) Ashkir

x) Midna

**6. " Fardo dhaadhi" waxa looga jeedaa :**

b) Fardo fuul

t) Fardo yaqaan

j) Fardoole

x) Dhammaan

**7. Arrin waliba waxay u dhacday :**

b) Sidii odaygu sheegay

t) Sidii ay rabeen

j) Si lama filaan ah

x) Dhammaan

**8. Guushii waxay raacday :**

b) Raacdadii

t) Raggii fardaha dhacay

j) Raggii fardooleyda ahaa

Scanned by TapScanner

**9. Faraska jilbaha madow ee oogada cad waxa la yidhaahdaa :**

b. Baroor

t. Ashkir

j. Xamar

x. Midna

**10. "Wegan fardo ah waxa looga jeedaa" :**

b. Boqol faras

t. Boqol iyo konton faras

j. Fardo dhawr ah

x. Fardo wanaagsan

**11. Inankiyo aabbihii waxay ahaayeen :**

b. Fardooley

t. Tuug

j. Geesiyaal

x. b iyo t

**12. Odaygu wuxuu ahaa :**

b. Indhoole

t. Waayeel

j. Fariid

x. Dhammaan

**13. Dixidu waa qayb ka mid ah :**

b. Cawska

t. Caanaha

j. Geedaha qadhaadh

x. Geedaha hadhka leh

**14. Dareemadu waa qayb ka mid ah :**

b. Midhaha

t. Caleenta

j. Cawska

x. Dhammaan

Scanned by TapScanner

**15. " in fardha la bawd furay'' waxa looga jeedaa :**

b. In ooddii fardaha la guray
t. In ooddii fardaha la boobay
j. In ooddii fardah la saaray
x. Dhammaan

**16. Raggii fardaha lahaa waxay hurdeen :**

b. Ardaayada
t. Aqallada
j. Xeryaha
x. b iyo t

**17. Odayga iyo inanku xilliga ay fardaha dhacayeen waxay ahayd :**

b. Goor galab ah
t. Goor habeennimo ah
j. Goor aroor ah
x. Dhammaan

**18. " habaaska ayaa lagu dhaafay " waxa looga jeedaa :**

b. Boodhka ayaa lagaga tegay
t. Bacadka ayaa lagaga tegay
j. Siigada ayaa lagu aasay
x. b iyo j

**19. " Fardihii way xasileen'' waxa looga jeedaa :**

b) Fardihii way dhergeen
t) Fardihii way carareen
j) Fardihii way daaqayaan oo socodkii bay joojiyeen
x) Dhammaan.

**20. Odaygii iyo inankii waxa ay wateen :**

b) Laba jigre
t) Laba jidib
j) Laba jare
x) Dhammaan.

Scanned by TapScanner

# Cutubka 10 aad: Geela

**2016**

Marka dhaqanka soo jireenka ah ee Soomaalida laga hadlayo, geelu waa qaniimada ugu qiimaha badan ee nolosha Soomaalida.Waxyaabaha kuu caddaynaya ama aad ka dheehan karto qiimihiisu waxa weeye, iyada oo geela loo adeegsado halbeegga magta dadka iyo xaqidda nabarrada.

Sida aynu ka war qabno Bani-Aadamka waa waxa ugu karaamada badan noolaha Illaahay abuuray.Haddaba, qofkii la dilo magtiisa waxa lagu qiyaasaa geela.Sidaa si la mid ah, qofkii nabar culusi gaadho, isagana magdhawga xubinta nabarku gaadhay waxa lagu xaqaa geel, waxaana loo adeegsadaa ereyada kala ah (hal, laba halaad iyo hal daloolkeed iwm) iyada oo lagu salaynayo hadba baaxadda nabarka iyo waxyeellada uu u leeyahay jidhka dhibbanaha. Magdhawga iyo xaqidda aynu ka hadlayno waxa had iyo jeer la kaashadaa culimada aqoonta u leh Diinta Islaamka.

Marka qoys cusub la dhisaayo, Soomaalidu waxa ay [illegible]abiaha ka bixin jir[illegible]n oo ay ku xididi jireen geela, waxa kale oo la raacin jiray fardaha iyo qoriga.

Geela waxa kale oo aynu [illegible] dhaqaale.Sababta oo ah waxa aynu u dhoofinnaa dalalka dibedda, gaar ahaan dalalka Carabta.

Geela waxa aynu ka helnaa hilib aynu cunno iyo caano aynu cabno. Caanaha geelu wxa ay caanaha oo dhan kaga duwan yihiin iyaga oo oolli kara muddo dheer oo toddobaadyo gaadhaysa, isla markaana la cabbi karo.

Geelu sidiisaba waxa uu ka unkamaa qurbac iyo nirig.Qurbacu marka uu koro waxa uu noqdaa awr, nirigtuna hal.Sida xoolaha kale ee aynu dhaqanno ayaa geelana loo jecelyahay in uu u bato dheddig.Sababtuna waxa weeye xagga taranka iyo manaafacaadka.

Sideedaba geelu waxauu magaca geel ku sifoobaa marka la xerriyo oo gooni loo saaro. Geelu markaa waxa uu leeyahay awr baarqab ah, nin mas'uul ah iyo ugu yaraan wiil dabadhoon ah. Awrka baarqab waxa lagu xulaa



©SLNECB

Scanned by TapScanner

qoodhnimadiisa iyo hidde raaca.Ereyga qoodhnimo waxa looga jeedaa qurux, qotan iyo meel joogsi.

Sababta oo ah awrka baarqab waxa shuruudahaa loogu xidhayaa tafiir ayaa laga rabaa. Geela had iyo jeer waxa loogu magic daraa hasha dhashay oo waxa la adeegsadaa ereyga ah (Dir heblaayo) tusaale ahaa Dir Maytiir.

Neefafka reeruhu haystaan ee aan la xerrin looguma yeedho gee lee waxa la yidhaahdaa "Halo". Halahaas waxa xero looga oodaa meel meel aan reerka ka dheerayn oo muuqata.

Awrka baarqabka ah ee geela lagu daro, marka uu si fiican u koro waxa geela lagu sii daayaa marka uu ugu yaraan (6-7) jir yahay.Qaalinta geela ahi waxa ay ku rintaa celcelis ahaan 6 sanno in kasta oo ay ku rimi karto 5 sannadood.

Nirigta iyo qurbacu illaa ay ka gaadhayaan hal iyo awr waxa jirta marxalad u dhexaysa oo la yidhaahdo "Aaran".Qaalinta geela ahi marka ay rinto waxa sidkeedu yahay 13 bilood oo u dhiganta 390 habeen.

Hasha neef ay uurka ku sidday marka uu ka soo dhaco isaga oo aan xilligiisii gaadhin lama yidhaahdo hashu waa ay dhicisay, waxa se la adeegsadaa erey u gaar ah geela oo ah (Hashu waa ay cabaad dheeraysay). Hashu uu ilmuhu ka dhintay si aanay u gudhin oo caanaha looga maalo laba hab ayaa la adeegsadaa:

- In maqaar lagu tolo, taas oo macnaheedu yahay haraggii neefka ka dhintay oo lagu qasbo in uu ilmaheedii yahay oo marka la hor dhigo candhadeeda la salaaxo si ay u godlato, ka dibna ay maggawdo oo sidaa caanaha lagaga maalo.
- In neef kale lagu sidko qurbac iyo nirig midka uu doono ha ahaadee oo ay hashu sidaa ku ahaato mid irmaan oo caanaha laga maalo.

Scanned by TapScanner

**10.1: Goobaab jawaabta saxda ah adiga oo adeegsanaya sheekada kor ku xusan:**

1. Geelu waxa uu ka unkamaa:
   - b. Hal iyo tulud
   - t. Hal keliya
   - j. Qurbac iyo nirig
   - x. Qaalin

2. Caanaha geelu waxa ay ooli karaan:
   - b. Muddo dheer oo sannado gaadhaysa
   - t. Muddo dheer oo toddobaadyo gaadhaysa
   - j. Muddo dheer oo qarniyo gaadhaysa
   - x. Muddo dheer oo bil gaadhaysa

4. Geelu waxa uu ka mid yahay:
   - b. Ilaha dhaqaale ee dalkeenna
   - t. Ilaha dhaqaale ee deriskeenna
   - j. Ilaha dhqaale ee dibedda
   - x. Intaba

5. Ereyga (hal daloolkeed) waxa uu ka mid yahay:
   - b. Ereyada lagu kala qaato xaqa ee loo adeegsado geela
   - t. Ereyada lagu kala qaato xaqa ee loo adeegsada dadka
   - j. Ereyada lagu kala qaato xaqa ee loo adeegsado gammaanka
   - x. Ereyada lagu kala qaato xaqa ee loo adeegsado lo'da

6. Halbeegga magta dadka iyo xaqidda nabarradu waa:
   - b. Lo'da
   - t. Fardaha
   - j. Doolarka/lacagta
   - x. Geela

7. Neefka geela ah had iyo jeer waxa loogu magic daraa:
   - b. Hasha dhashay
   - t. Awrka dhalay
   - j. Reerka
   - x. Sida ay noqoto



Scanned by TapScanner

8. Nirigta iyo qurbacu ilaa ay noqonayaan hal iyo awr waxa jirta da' u dhexaysa oo la yidhaa:
   b. Horwey
   t. Eeloweyn
   j. Gaane
   x. Aaran
9. Awrka baarqab ah waxa geela lagu daraa marka ay da'diisu tahay:
   b. Ugu yaraan 9 ilaa 10 jir
   t. Ugu yaraan 6 ilaa 7
   j. Ugu yaraan 12 ilaa 15
   x. Intaba
10. Hashu marka ay dhasho ilmo aan sidkiisu gaadhin waxa loo yaqaan:
   b. Hashu waa ay dhicisay
   t. Hashu waa ay cabaad dheeraysay
   j. Hashu waa ay tebisay
   x. Intaba
11. Hasha marka ilmuhu ka dhinto si aanay u gudhin waxa loo adeegsadaa laba ha boo kala ah:
   b. In maqaar lagu maalo ama nirig kale lagu sidko
   t. In la xidho
   j. In la gudhiyo
   x. Intaba
12. Qaalinta geela ahi waxa ay ku rintaa ugu yaraan:
   b. 9 ilaa 10 sanno
   t. 8 ilaa 9 sanno
   j. 5 ilaa 6 sanno
   x. Midna
13. Awrka baarqabka ah ee geela lagu darayo waa:
   b. La xushaa
   t. La xidhaa
   j. La xareeyaa
   x. La xaraashaa



Scanned by TapScanner

14. Hashu marka ay rinto waxa uu sidkeedu yahay:
    b. 13 bilood
    t. 12 bilood
    j. 9 bilood
    x. Sannad
15. Sidiisaba geelu waxa uu magaca geel ku sifoobaa:
    b. Marka uu reerka joogo
    t. Marka la xerriyo ee gooni loo saaro
    j. Marka uu iib baxaayo
    x. Marka uu irmaan yahay
16. Geelu waxa uu leeyahay:
    b. Awr baarqab ah iyo oday
    t. Rag agaasiama
    j. Awr baarqab ah, nin mas'uul ah iyo wiil dabadhoon ah
    x. Midna
17. Marka qoys cusub la dhisayo Soomaalidu waxay hablaha ka bixin jireen:
    b. Geel
    t. Gammaan oo keliya
    j. Qori keliya
    x. Intaba
18. Magdhawga iyo xaqidda nabarrada had iyo jeer waxa la la kaashadaa:
    b. Waalidka
    t. Dhibanaha
    j. Dacwaysanaha
    x. Culimada
19. Geela waxa aynu u dhoofinaa:
    b. Dalalka Carabta
    t. Dalka Itoobiya
    j. Dalka Hindiya
    x. Intaba
20. Awrka baarqabka ah waxa la gu soo xulaa:
    b. Midabkiisa
    t. Qoodhnimadiisa
    j. Dhererkiisa oo keliya
    x. Intaba
21. Ereyga qoodhnimo waxa looga jeedaa:
    b. Dherer
    t. Midab
    j. Geesinimo
    x. Qurux, qoton iyo meel j



©SLNECB

Scanned by TapScanner

**11. 1: Goobaab geli jawaabta saxda ah:**

1. Xeer-beegti waa:
   - b. Guurti
   - t. Garyaqaan
   - j. Nabaddoon
   - x. Isimmo
2. "Wadhaf dayn laga xooray " waxa looga jeedaa:
   - b. Dhagax la tuuray
   - t. Shiid
   - j. Wadhaf jar laga tuuray
   - x. Intaba
3. Ereyga (Le'day) macnihiisu waa:
   - b. Laayay
   - t. Seexday
   - j. Baaqday
   - x. Dhintay
4. Ereyga (Maalley) macnihiisu waa:
   - b. Xabag madow oo ka timaadda geedka maraaga
   - t. Dharkaynka
   - j. Malaxda
   - x. Halis
5. "Macnihiyo ujeeddadu. Si aanay mergi u noqon
   Mindi-roortu ugu dhicin. Bal aan jaro makaabbaha"
   Meerisyadan waxa tiriyay:
   - b. Xasan Sheekh Muumin
   - t. Xasan Qawdhan
   - j. Xasan Ganay
   - x. Hadraawi



©SLNECB

Scanned by TapScanner

t. Magac u yaal lahaansho
j. Magac
x. Yeele

7. Ereyga inoo qeexa wax kasta oo la sameeyo waxa loo yaqaan:
   b. Qodob
   t. Magac
   j. Fal
   x. Falkaab

8. Erey kasta oo caddeeya sida ay wax u dhaceen waxa la yidhaa:
   b. Falkaab
   t. Fal-magudbe
   j. Magac
   x. Sifo

9. Ereyga raaca magaca waxa loo yaqaan:
   b. Sifo
   t. Fal
   j. Yeele
   x. Tilmaame

10. Ereyga sheega meesha falku ka dhacay waxa loo yaqaan:
   b. La yeele
   t. Yeele
   j. Meeleeye
   X. Falka

11. "Umal iyo adoo gaajo qaba oo col ku eryaayo"

   Ereyga (Umal) macnihiisu waa:

   b. Kulayl
   t. Ummul
   j. Cadho
   x. Shiddo

Scanned by TapScanner

12. Aadan Galaydh waxa uu dhalay:

b. 20 inan
t. 12 inan
j. 15 inan
x. 10 inan

13. Koofil waxa la dilay:

b. Sannadkii Dulmadoobe
t. Jidbaale 1912[kii]
j. Daratoole 1911[kii]
x. 1913[kii]

14. "Rogaalkuu giraangirin ogaa gocanayaa mooyi"

Meeriskan macnihiisu waa:

b. Waxaan tebayaa sidii uu wax u dili jiray
t. Waxaan tebayaa sidii uu isu giraangirin jiray
j. Waxaan tebayaa sidii uu u ordi jiray
x. Waxaan tebayaa sidii degdegga ahayd ee uu cadowga u weerari jiray

15. "Cartan dhuurta kooraha markuu kor ugu laalaayay"

Meeriskan macnihiisu waa:

b. Cartan markii uu faraska heenseeyay
t. Cartan markii uu heensihii faraska geedka dusha ka saaray
j. Cartan markii uu xanaaqay
x. Cartan markii uu dhuurta dusha ka fuulay

16. "Gar leexsan, Gacan gudhan iyo Guddoon jilicsan"

Saddexdaa arrimood waxa ay nusqaan ku yihiin:

b. Culimada
t. Siyaasiyiinta
j. Odayaasha
x. Madaxda

Scanned by TapScanner

17. "Laba fadhiga ayay ku wanaagsan tahay":
    b. Lo'da iyo idaha
    t. Dumarka iyo duunyada
    j. Dumarka iyo dabka
    x. Dayaxa iyo cadceedda

18. Laba ayaa xoolaha dhiqi kara:
    b. Lixdan jir taajir ah iyo laba jir carruur ah
    t. Lixdan jir caydh ka baqaya iyo laba jir ul ka baqaya
    j. Labaatan jir iyo lixdan jir
    x. Intaba

19. Ereyga "Awaare" waxa la mid ah:
    b. Bootaan, boodh, habaas iyo bus
    t. Siigo, duf, dambaaburo
    j. Boodh, ufo, gaydh
    x. Intaba

20. "Mijo-haadle" ereygan macnihiisu waa:
    b. Daruur weyn
    t. Daruur dhuuban oo dhulka ku dhow oo hoortay
    j. Daruur casar
    x. Lugo dhuuban

Scanned by TapScanner

# Cutubka 13 aad: Maansooyin

**1. Buuxi meerisyada hoosta ku qoran meelaha bannaan (Imtixaankii 2005)**

**b)** Gorayadu ilmaheeda ..........................................................
Aboodigu ku laayaa ..........................................................
Ilaxidhoo ammaanbay ..........................................................

**t)** .......................................................... Aradaduu mirtaa buu
Cadowgu ku ugaadhaa Aboorkuna dudumadaan
Aragnay buu dhistaayoo ..........................................................

**j)** Kala awran labaduye ..........................................................
Asluubtay isku dhaafeen ..........................................................
Itaal in uu ka roon yahay ..........................................................

**2. Tixahan soo socda su'aalaha la xidhiihda ka jawaab (Imtixaankii 2005)**

Dadkaa heegada is geeyay. Dadkaa haqab-beelka gaadhay.Hubqaad kaga dayo miyaa?Ninkaa buurta roobku helayee.Gunteeda ka heesayow.Figteedaa nolol habboon.

**b.** Abwaanku muxuu innagu tirtirsinayaa ama ka hadlayaa?

..........................................................

..........................................................

**t.** Maansadanla magic baxday (Hayaan) yaa curiyay?

..........................................................

**j.** Qofka dantiisa loo tilmaamo ama loo asteeyo maxaa ku habboon inuu yeelo?

..........................................................

..........................................................

Scanned by TapScanner

x. Meerisyadan ama tixaha ... faahfaahi?

Markii hore candhuuf baan ahaa caano oo kale
Markii xigay casaan dhiig ah oo cad iyo jiidh yeeshay
Markii xigay calooshii haween baan dhex carcararaayay

..............................................................

..............................................................

..............................................................

..............................................................

(Imtixaankii 2007)

3. Su'aalo kooban

b. Maxaa lagu dagay Yackoo?

..............................................................

..............................................................

t. Wakhtigii la tiriyey gabayadii Silsiladda Xaydha maxaa inoo gaadiid ahaa?

..............................................................

j. Xirsi Caamir subag sidee ah ayuu keenay?

..............................................................

..............................................................

x. Laba gadiid waa intee?

..............................................................

Kh.Xirsi Caamir maxaa uu u watay gaadiid ahaan?

..............................................................

**Sharrax baydkan:**

Nin wixii hungurigiisa maray hiifay waa qadafe

..............................................................

..............................................................

Sheeg saddex arrimood oo fardaha loo adeegsan jiray?

..............................................................

..............................................................

Scanned by TapScanner

**s.** Sheeg sababta loogu adeegsan jiray?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

**Sh.** Intee nooc ayaa subagga xooluhu u kala baxaa?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

**(I)** Kala saar oo midba gaarkiisa uga hadal subagyada kala duwan?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

..............................................................................................................

..............................................................................................................

**dh.** Qaddarin sideeya ayaa gacalku mudnaa?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

**(i)** Anfaco gacalka la siinaayo sidee iyo xaaladdee loo maamuli jiray?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

**(ii)** Xirsi Caamir sidee ayaa uu u galay nimankii Reer Aadan?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

**C.** Falanqee fidmada Weerar Cali Geelle ka dhex riday kooxdii socdaalka ku jirtay?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

..............................................................................................................

**(i)** Maxkamadee qaaday gartii?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

**(ii)** Sidee loo qaaday gartii?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

..............................................................................................................

Scanned by TapScanner

6. **Hilib iyo maakhirba waa heli karayseene**

(i) Waa maxay maakhirku? Sidee iyo xaggee laga helaa?

....................................................................................................

....................................................................................................

....................................................................................................

(ii) Waxa baydka ku cad in la hagraday caddee tabashadooda?

....................................................................................................

....................................................................................................

**7. Ka bixi sharrax buuxa dulucda macne ee tixahan hoos ku qoran**
**(Su'aashani waxay ku timi imtixaanadii2008,2012,2014)**

Hadduu geed engego xaabadaa lagu idlaystaaye
Mid yar oo iniintiisa ah baa soo awaal baxa'e
Isagaa anfaaciga hadhkiyo oodda kaafigay e
Dadkana odaygu goortuu ka baxo iyo islaantiisu
Ubadkooda hadha baa tabcoo aayatiin hela'e

....................................................................................................

....................................................................................................

....................................................................................................

....................................................................................................

....................................................................................................

**5. Sharrax ka bixi tuducan heesta ah** **(Imtixaankii 20**

Hooyooy la'aantaa Higaad lama barteenoo
Hadal lama kareenoo Ruux aanad habinooo
Kolba aanad hees iyo Hoobay ku sabinoo
Hawshaada waayaa Hanaqaadi maayee

....................................................................................................

....................................................................................................

....................................................................................................

Scanned by TapScanner

**6.Sharax ka bixi saddexda shay ee abwaanku ku matalay faraskiisa? (Imtixaankii 2009)**

Gammaan waa kala waare
Wehadow orodkiisu
Wadhaf dayn laga xooriyo
Taarka laysku war qaadiyo
Ma waayeenka shukaantoo
Wanaag loogu qabtaa

..................................................................................................................
..................................................................................................................
..................................................................................................................
..................................................................................................................

**7. Sharax sida uu farasku ugu dhigmo labada nooc ee uu barbar dhigay gabyaagu?(Imtixaankii 2009)**

Warisow midabkiisu
Cirka oo wadhanaayoo
Wahabkii laga qaadiyo
Ma waagoo sagliyaa

..................................................................................................................
..................................................................................................................
..................................................................................................................
..................................................................................................................
..................................................................................................................

**8. Sharax waxa uu tixdan uga jeedo gabayaagu?(Imtixaankii 2009)**

Haddii aan lingaxo oo qalbiga lahashada u diido
Oo aanan luunkaba ka rogin lur ima gaadheene

..................................................................................................................
..................................................................................................................
..................................................................................................................
..................................................................................................................



Scanned by TapScanner

**9. Akhri tixdan ka dibna ka jawaab su'aalaha ka dambeeya?(Imtixaankii 2010)**

*Af Xakame karkabadii u ay iyo kulaylkiiye*
*Ka dambee Caluu yidhi intuu Kaaha guursadaye*
*Kii kalena kaalweyn u tumay karina waabay'e*

(i) Caddee aanada uu galay Af-xakame waxa ay ahayd?

..................................................................................................

..................................................................................................

..................................................................................................

(ii) Sifee sida kibirka uu u waxyeeleeyo cida ku kacda?

..................................................................................................

..................................................................................................

..................................................................................................

**10. Akhri tixdan ka dibna ka jawaab weydiimaha ka dambeeya(2010)**

Marka aad nin himilada, hilin toosan mariyoo
Siideyn hoggaankoo , hawlaha qorsheeyoo
Hir markii la gaadhaba, ku labaad hillaadshoo
Haga maatidiisoo, la hiigsado dhashaabaa
Hooyo lagu xasuustaa.

**b).** Tibaax waxa looga jeedo himilada?

..................................................................................................

..................................................................................................

..................................................................................................

**t).**Tusaale ka bixi dulucda macne ee ku jira tuducan hoos ku qoran?

Hir markii la gaadhaba ku labaad hilaadsho

..................................................................................................

Scanned by TapScanner

**11. Akhri meerisyadan hoose oo ka jawaab waydiimaha la xidhiidha (Imtixaankii 2011)**

Ruuxaad hagaysiyo usha nimaad u haysaa,
hilin toosan weligii , ka habaabi maayee,
hooyooy addoomuhu halkay maanta joogaan
adigaw horseedee.

i. Maxaa looga jeedaa **hilinka toosan?**

..........................................................................................................

ii. Sharrax sida hooyadu ugu horseedo aadamaha nolosha horumarka leh?

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

**12.** Tacliin aabbahay wuxuu i baray tooyad soo godale **(Imtixaankii 2012)**
Tiska oodda iyo baan aqaan tirada xoolaha'e
Intii aan tuldaha jaanwadwaday rag iga tooreeye

i) Waa maxay gabyaagu waxa uu ka calaacalayaa?

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

**13.** Gudcurkiyo cadadu waa walaal kalase guul roone**(Imtixaankii 2012)**
Gaadiid la dhaanshuu ahaa gibil ma daadshiiye
Guraduu na wada saari jiray gocanayaa mooyi

(i)Falanqee dulucda macne ee ay xambaarsan yihiin tuducyadan baroordiiqda ah?

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

**14.** Faaraxaw rafashadaydii iyo hurdo la'aantaydii xalay markaan dermada ... seexday jidhiidhicadii jidhkayga ku roortay. Cuntadii la' iisoo dhigay waxa... afka u saariwayay.**(Imtixaankii 2013)**

i. Qor tuducyo u dhigma sharraxan kor ku xusan " xusuuso gabaygii baroordiiq"?

.................................................................................................

.................................................................................................

.................................................................................................

**15.** Sida koorta yucub oo la sudhay koromo buubaal ah **(Imtixaankii 2013)**

Ama geel ka reeb ah oo nirgihii laga kaxaynaayo

Ama beelo kaynaan ah oo kor u hayaamaaya

Ama habar kurkii keli ahaa lagaga kawsiiyay

(i). Falanqee waxa uu abwaanku uga jeedo "kurkii keli ahaa lagaga kaw siiyay"

.................................................................................................

.................................................................................................

.................................................................................................

**16.** Waxay tidhi dhulyahaw eheladaa malaha eemaane **(Imtixaankii 2013)**

Illaaleeyay oo dunida way ugu illiitaane

Iyagaa ablayda isu sita eebo xoogbane

(i) Si kooban u sharrax macnaha tuducyadan?

.................................................................................................

.................................................................................................

.................................................................................................

.................................................................................................

**17.** Ragganimo aayar heli waaye nimaan tacab u marin**(Imtixaankii 201**

(i) U qor dhismaha meeriskani sida uu saxa ku yahay?

.................................................................................................

Scanned by TapScanner

18. Xalay kololo'aygii ma ledin kaamil reeruhuye (Raage Ugaas)
(i) Sheeg sababta uu u ledi waayey abwaanku?**(Imtixaankii 2014)**

.....................................................................................................................

.....................................................................................................................

.....................................................................................................................

19. Kallixiiba baan leeyihiyo laabta xuushada'e. (M.Nuur.Fadal)
(i)si kooban u sheeg dulucda macne ee meeriskan?**(Imtixaankii 2014)**

.....................................................................................................................

.....................................................................................................................

.....................................................................................................................

20. Marka aad nin himilada **(Imtixaankii 2014)**
Hilin toosan mariyoo
Siidayn hogaankoo
Hawlaha qorsheeyoo
Hir markii la gaadhaba
Ku labaad hilaadshoo............. (Hadraawi)

j)Faaqid meerisyadan ninka uu abwaanku kaga hadlayo?

.....................................................................................................................

.....................................................................................................................

.....................................................................................................................

21.Laxawsiga xigtada la ii gashiyo lahashadaan eeday**(Imtixaankii 2016)**
Kal laxiiba baan leeyahay iyo laabta xuunshada'e

b. Sharrax ka bixi dulucda meerisyadan

.....................................................................................................................

.....................................................................................................................

.....................................................................................................................

.....................................................................................................................

22. Tanna xoogsi kama soo taraan taana laga waaye**(Imtixaankii 2016)**

b. Si kooban u sheeg cidda uu ku dhaliilayo gabayaagu meerisyadan

.....................................................................................................................

.....................................................................................................................



Scanned by TapScanner

t.Caddee labada meelood ee uu ku xusay (tanna iyo taana) gabayaagu meeriska sare?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

**23.** Kaakici wadaadkii dagaal laguna kaalmeeye**(Imtixaankii 2016)**

Kumanyaal lag wada duub cadbuu keenay Beerdhiga'e

Waxse kadabkiiba go'ay maalintuu kaday raggiisiiye

b. Sharrax macnaha meerisyadan?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

..............................................................................................................

..............................................................................................................

..............................................................................................................

**24.** Innamiyo habloba waxaad tihiin aaran kacayaaye**(Imtixaankii 2016)**

Itaal gabe dadkiinii hore oo waydun aragtaane

Idinkaa ammaanadii xilkii eeggan qaabiliye

b. Soo bandhig farriinta ay gudbinayaan meerisyadani?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

..............................................................................................................

..............................................................................................................

..............................................................................................................

**25.** Dubkaa kala taggane haybta waysugu tegaynaaye**(Imtixaankii 2016)**

b. Sharrax ka bixi meeriskan?

..............................................................................................................

..............................................................................................................

..............................................................................................................

..............................................................................................................

Scanned by TapScanner

**26.** "Geb hadday martidu soo tidhaa goor uu nala joogo
Godka lagu janneeyow hadduu goosan la carraabo"
b.Si kooban u sheeg dulucda meerisyadan sare?**(Imtixaankii 2017)**

.............................................................................................................

.............................................................................................................

.............................................................................................................

.............................................................................................................

.............................................................................................................

**27.** "Gaashaanka dhaqankii ahaa waa la gees maraye**(Imtixaankii 2017)**
Xeerkiyo garsoorkii mudnaa gaabis baa helaye"
b. Caddee waxa dhaqankii iyo garsoorkii ku dhacay ee gabayaagu sheegayo?

.............................................................................................................

.............................................................................................................

.............................................................................................................

.............................................................................................................

.............................................................................................................

**28.** "Ul buu kaaga reebaa wixii kaa itaal badane **(Imtixaankii 2017)**
Ha ka eegin doqon kaama rido aar ku sii sida'e"
b. Labada qof ee abwaanku ku xusay meerisyadan mid kasta tilmaan ka bixi

.............................................................................................................

.............................................................................................................

.............................................................................................................

.............................................................................................................

.............................................................................................................

**29.** "Uf qabiilka anaa leh. Wuxuun baa ku adeegta. **(Imtixaankii 2017)**
Nin iskii kartidiisa.Isagoon cid ku tiirsan. Isu taagi karaynin"
b.Sharrax ka bixi dulucda meerisyadan

.............................................................................................................

.............................................................................................................

.............................................................................................................



Scanned by TapScanner

# Cutubka 14 aad: Maahmaahyo

**1. Maahmaahyadan akhri oo fahan oo mid walba sharrax waxa ay ku saabsan tahay (2005)**

b).Awrka dambe awarka hore socodkiisa ayuu leeyahay

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

t).Booraan hadimo ha qodin haddaad qodana ha dheeraynku dhici doontaana mooyee.

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

j).Nin weyni wadkii wuu yaqaan

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

x).Nin aad dhashay kuma dhalin

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

Kh).Daacadi ma hungawdo

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

Scanned by TapScanner

**2. Ka qor mid kasta hal maahmaah mawduucyadan hoos ku qoran** (2009)

b) Abaalka.................................................................

t)Deeqsinimada.........................................................

j) Iskaashiga.............................................................

x) Guurka..................................................................

kh). Dhirta................................................................

**2. Su'aalo fidsan: (2010)**

**sharax ka bixi waxa looga jeedo maahmaahahan hoos ku qoran**

**b) Ama arrin keen ahaw ama aqbal keen ahaw**

(i) Arrin keen ahaw ..............................................................

..............................................................................................

(ii) Ama aqbal keen ahaw ........................................................

..............................................................................................

iii) Sidee ayaa uu dadku u arkaa ninka ku dhaqma maahmaahdan?

..............................................................................................

..............................................................................................

**t).Hal libaax arkaysaa ma godlato.**

Sharax waxa looga jeedo hasha iyo libaaxa adiga oo maanka ku haya dhacaday ku baxday.

(i) Hal..........................................................................................

..............................................................................................

(ii) Libaax.....................................................................................

..............................................................................................

**Ka qor mid kasta hal maahmaah ah mawduucyadan hoose (2010)**

b) Nabadda..................................................................................

t) Geesinimada............................................................................

j) Talada.......................................................................................

x) Daacadnimada..........................................................................

Scanned by TapScanner

**5. Hal xaaraan ahi nirig xalaal ah ma dhasho** **(2011)**

i) Sharax sababta aanay u dhalaynin nirig xalaal ah, hasha boolida ahi?

.............................................................................................

.............................................................................................

.............................................................................................

.............................................................................................

**6. "Nimaan kuu furi doonin yaanu kuu rarin''** **(2011)**

i) Sheeg arrinta ay ku baxday maahmaahdani?

.............................................................................................

.............................................................................................

.............................................................................................

.............................................................................................

**7. Keen maahmaaho ku saabsan meesiyada xoolaha ee hoos ku qoran**
**2012)**

i) Geela .............................................................................

ii) Fardaha...........................................................................

iii) Lo'da.............................................................................

iv) Adhiga...........................................................................

**Ciddii aan dantaada wadin marka ay damacdo in ay ku lug goyso waxa**
**gu maahmaahaa:** ''Nin fadhigaaga arkaaya looma sare kaco'' **(2013)**

i) Ma ku saxbaa maahmaahdani sida loo adeegsaday?

.............................................................................................

ii) Sheeg sababta?.............................................................

.............................................................................................

iii) Qor adigu maahmaahda ku habboon?

.............................................................................................

Scanned by TapScanner

(2013)

9. Nin fadhigaaga arkaya looma sare kaco?

i) Falanqee aragtida shiche ee maahmaahdani gudbinayso?

(2014)

10. Ama arrin keen ahaw ama aqbal ka ahaw.

i) Si kooban u sheeg dulucda maahmaahdan?

(2014)

11. "Nin dameero wataa dad la tooyasho maaha".

b) Maxaa looga jeedaa la tooyasho maaha?

(2014)

**12). "Ammaano kugu raagtay yeddaa baad moodaa"**

b) " Yeddaa baad moodaa" maxaa looga jeedaa?

(2014)

**13). "Hal libaax arkaysaa ma godlato"**

*b) Sheeg sababta aanay hashu u godlanaynin?*

(2014)

**4). "Suldaanaw, saydh tegayey baan soor ka reebayey"**

*b). Kuma ayuu ahaa ninkii maahmaahdan yidhi?*

*Qor maahmaah ku saabsan ammaanada?***(Imtixaankii 2016)**

Scanned by TapScanner

**16)** Dhicisku inta birta loo soo sido ayuu ka bakhtiyaa **(Imtixaankii 2016)**

i. Sharrax ka bixi macnaha maahmaahdan?

..................................................

..................................................

..................................................

..................................................

..................................................

**17)** Qor maahmaah ku saabsan abaalka?**(Imtixaankii 2016)**

..................................................

..................................................

**18)** Qor maahmaah ku saabsan waalidka iyo ilmihiisa?**(Imtixaankii 2016)**

..................................................

..................................................

**19)** Qor murtidii uu (yidhi) bixiyay Raage Cadduur **(Imtixaankii 2017)**

..................................................

..................................................

**20)** Qor maahmaah ku saabsan luggooyada**(Imtixaankii 2017)**

..................................................

..................................................

**21)** "Rag aamusay iyo riyo aamusay reerkoodii gabe"**(Imtixaankii 2017)**

b. Sharrax ka bixi dulucda maahmaahdan?

..................................................

..................................................

..................................................

..................................................

Scanned by TapScanner

(2018)

23) Sharrax ka bixi maahmaahahan:

I. Meel hoo doonaysa hadal waxba kama taro

II. Mar I dage Alle ha dago laba goor I dage se anaa is dagay

I. Hal libaax arkaysaa ma godlato

Scanned by TapScanner

# Cutubka15 aad: Macnaha ereyad...

## Qaybta 1aad

Ereyadan hoose mid walba erey ama ereyo la micno ah keen. (2005)

1. Fayaw.......................................
2. Ilmo.......................................
3. Hiq .......................................
4. Kala jar.......................................
5. Gunuus .......................................

## Qaybta 2aad

**B.Sharax ereyadan** **(2007)**

1. Xilli .......................................
2. Xayn.......................................
3. Xigaal.......................................
4. Xaas.......................................
5. Xuuko.......................................

**T.Keen lidka ereyadan**

1. Aar .......................................
2. Habeenimo .......................................
3. Aakhiro.......................................
4. Miciin.......................................

Scanned by TapScanner

## Qabta 3aad (2008)

**(B) Qor macnaha ereyadan**

1. Digarogasho........................................
2. Hanaqaad........................................
3. Dhabanka........................................
4. Dawaad........................................
5. Feydan........................................
6. Dambar........................................
7. Hadhuub-gaal........................................
8. Guul-cokan........................................
9. Guul-ooman........................................
10. Dhaqanyo........................................

**T. Lidka ereyada**

1. Aftahan........................................
2. Abaar........................................
3. Heshiis........................................
4. Gudcur........................................

## Qaybta 4aad (2009)

**(B) Sharax ereyadan**

1. Hanaqaad........................................
2. Hilin ........................................
3. Qooddi........................................
4. Dhabeel........................................
5. Hindise........................................
6. Gammaan ........................................
7. Goonyaha ........................................
8. Baxsi ........................................
9. Dhalan dhool ........................................
10. Xiddid ........................................

Scanned by TapScanner

(T) Qor lidka ereyadan

1. Sange ..........
2. Eex ..........
3. Keli ..........
4. Fidsanaan ..........
5. Basari ..........

## Qaybta 5aad (2010)

(B) Qor macnaha ereyadan

1. Tabantaabo ..........
2. Hammi ..........
3. Arammi ..........
4. Jabad ..........
5. Dhunkaal ..........
6. Tusmo ..........
7. Neef dheddig oo geel ah..........
8. Ciilkaambi ..........
9. Tis ..........
10. Hiyi ..........

